- Hagaaji muraayada gudaha si ay u qabato muraajada danbe. Haddii aad leedahay muraayada maalinta/habaynka, xaqiiji inay u diyaarsan tahay wakhtiga maalinta ee aad gaariga wado oo u adeegso inaad uga hortagto caadka kaaga yimaada nalalka hore ee gaariyaasha kaa danbeeya. Wax ka badel muraayad danbeedka iyo muraayadaha geesaha kahor inta aadan bilaabin gaari wadista waayo marka saxmadu jirto, marka aad aadka ugu baahan tahay, ma heli doontid wakhti aad ku hagaajiso.

Hagaaji muraayadaha banaanka si aad u hesho aragga ugu fiican ee geesaha iyo gadaal. Halkaan ayaad ka helaysaa sida aad u toosinayso muraayadahaaga banaanka. Si aad u toosiso muraayada dhanka bidix, madaxa saaro daaqada xiran ee dhanka bidix. Toosi muraayada ilaa aadan si fiican u arkin geeska midix ee danbe ee gaarigaaga.



- Si aad u toosiso muraayada geeska midig, u eexi madaxaaga dhanka midig ilaa uu ka hoos maro muraayada gadaale. Toosi muraayada ilaa aadan si fiican u arkin geeska midig ee gaarigaaga.

## Xirashada Suumanka Badqabka

Markasta adkee suunkaaga amaanka. Qof kasta oo saaran gaarigaaga waa inuu leeyahay suunka amaanka ama kursiga badqabka ilmaha.  Suumanka amaanka ayaa yareeya dhaawacyada iyo geerida marka shil dhaco.  Waxay kaa ilaalinayaan inaad gaariga ka faniinto. Fursadahaaga ka badbaadista shilka ayaa ka fiican shan jeer haddii aad ku jirto gudaha difaaca gaarigaaga.



Gudaha Maine waa sharci daro inaad gaari wado adiga oo aan xiran suunka amaanka.

Waxaad awood wanaagsan u helaysaa maareynta xaalada degdega ah haddii aad xiran tahay suumanka badqabka. Haddii aad xirato suunka dhabta suuragalnimadaada ka badbaadista marka aad gaari kale ku dhacdo ayaa labo jibaar ka badan inaad ku dhimato. haddii aad xiran tahay labadaba suunka dhabta iyo kan garabka fursadahaaga badbaadista ayaa sadex jibaar ah. Waxay kaa ilaalinayaan inaad gaariga ka faniinto. Suumanka amaanka ayaa sidoo kale ka caawiya darawalka inuu xakameeyo gaariga. Sidaan ayaa uga hortagaysaa:

- Waxay kaa caawinayaan inaad gees uga liicdo kursiga marka aad joogsi degdeg ah samayso iyo marka aad leexanayso, Waxay kugu haynayaan isteerinka wax kasta oo dhacaba. Ma maamuli kartid gaarigaaga haddii aad ku sinbiqato isteerinka.
- Waxay yareeyaan dhaqdhaqaaqa jirkaaga marka gaarigu ruxmaayo. Haddii aadan xirnayn suumanka amaanka aad shil gasho, sidaan ayaa dhacaysa:




*Gaarigaaga ayaa joogsanaaya laakiin waxaad ku sii soconaysaa isla xawaarihii gaarigu ku socday, ilaa aad ku dhacdo shirka gaariga ama muraayada hore. Xawaare dhan 30 MPH, tan waxay u dhigataa inaad dhulka ku dhacdo adoo kasoo dhacay dhisme sadex dabaq ah.*

- Waxay kaa caawiyaan inaad soo jeedo ayagoo kaa ilaalinaaya inaad liicdo inta aad gaariga wado. Waxay sidoo kale kaa caawinayaan inaadan daalin ayagoo meesha ka saaraya hawsha ku durkida meesha marka gaarigaagu liico ama leexanaayo.



*Haddii wax kaaga dhacaan geeska, jugta ayaa kaa riixi karta kursiga. Suumanka amaanka ayaa kugu haynaaya goobta si aad u xakamayso gaariga.*

Qaabka keliya ee suumanka amaanku shaqadaan ku qaban karaan waa haddii aad xirto. Mar jirto wakhti aad ku xirato marka xaalad degdeg ah dhacdo. Waa inaad xirataa kahor inta aadan gaariga kicin.

**FIIRO GAAR AH:** Ku dhawaad 45,000 oo qof ayaa ku dhinta shilalka gaariyaasha gudaha Mareykanka sanad kasta. Shilalka noocaas ah ayaa inta badan sababa geerida dadka da'doodu u dhexayso 1 sano ilaa 34 sano. Tirakoob ahaan, muwaadin kasta wuxuu leeyahay hal kamid ah sadexdii fursadood oo uu ku geli karo shil xun inta uu nool yahay. Marka si sax ah loo adeegsao suumanka amaanka ee dhabta iyo garbaha ayaa yareyn kara khatarta dhaawaca daran ama geerida 40-55%.

Ayadoo ay jiraan tirakoobyadaan, in ka badan nulka dhammaan Ameerikaanka qaangaarka ah ayaan xiran suumanka amaanka. Da'yarta ayay xataa ugu badan tahay inay sidaas sameeyaan, waxaa la qiyaasay in wax ka badan rubuc kamid ah dhammaan dhalintu adeegsadaan suumanka amaanka.

Si aad qaab sax ah ugu xirato suumanka amaanka:

- Xiro suumanka garbaha oo aad ku xirayso garabka iyo xabadka. Toosi suunka garabka si uu u qabsado meesha laakiin uusan aad kuugu dhagin uuna bad u dhexeeya feer ka qaadan yahay xabadkaaga. Suunka garabka waa **inuusan** ka hoos marin gacantaada ama ka danbayn dhabarkaaga. Tan ayaa sababi karta dhaawacyo gudaha ah marka shil dhaco.
- Adkee suunka dhabta, laakiin ha ahaado mid raaxo leh, oo ku dhagan dhabtaada iyo sinaha. Xaqiiji inuu ka hooseeyo calooshaada uuna saaran yahay lafaha sinahaaga. Tan ayaa kaa caawinaysa inaadan ks siiban suunka amaanka marka shil dhaco.
- Haddii aad u xirato suumanka amaanka sidaan, waxay ku siinayaan raaxo, waxayna ku siinayaan difaac badan.



**Suunka amaanka waa in la xidhaa xataa haddii aad haysato bacda aariyada.** Gaariyaal badan ayaa hadda leh bacda aariyada taasoo buufmaysa marka jug hore ku dhacdo. Boorso haweedka ayaa ku siinaaya difaac dheeri ah marka qaybta hore ee gaarigaaga ay ku dhacdo, ama uu ku dhaco, wax. Waa inaad sidoo kale adeegsataa suumankaaga amaanka si aad u hsho difaac buuxa inta lagu jiro shilka.

## Boorso haweedka

Boorso haweedka ayaa la shaqeysa suumanka amaanka. Marka aad shil gasho, boorso haweedka iyo suumanka badqabka ayaa ka caawin kara madaxaaga iyo qaarka kore inuu ku dhaco isteerinka ama buudka hore ee shirka. Suumanka amaanka iyo boorso haweedka ayaa kaa caawinaaya difaaca marka aad gasho shilka gaariga. Suumanka amaanka ayaa meesha kugu celinaaya marka gaarigu wax ku dhaco. Markasta xiro suumanka amaanka, xataa haddii aad haysato boorso haweedka.

Akhri buuga mulkiilaha si aad uga hesho xog gaar ah oo ku saabsan boorso haweedka.

## Ilaalinta Badqabka Carruurta

Xaqiiji in kursiga amaanka ilmaha aad si sax ah u adeegsato. Dhammaan carruurta da'da 12 sano iyo ka yar waa inay fariistaan kursiga danbe. Marna ha saarin kursiga amaanka ilmaha ee gadaal boorso haweed shaqeynaysa. Si aad u xaqiijiso in ilmuhu si amaan ah gaariga u raacaan, xasuusnoow xeerarkaan.

- Akhri buug tusmeedka mulkiilaha ee gaarigaaga iyo tilmaamaha ilaalinta ilmaha si aad u hesho xog gaar ah. Kursiga badqabka waa in si sax ah meesha loogula xiraa suumanka amaanka ee gaariga ilmuhuna waa inuu si sax ah ugu xiran yahay kursiga amaanka ilmaha.

- Kursiga danbe waa meesha ugu amaansan ee ilmaha da' kasta uu gaariga ku raaci karo. Saqiirada, kayar 2 sano, waa inay markasta raacaan kursiga gadaal u jeeda. Ilmaha jira labo sano iyo ka wayn kursiga horey u jeeda.
- Xaqiiji in qof kasta suunku u xiran yahay. Dadka suunka iska furay ayaa waxyeelo kasoo gaari kara ama ku dhiman kara boorsada hawada.
- 12 sano jirka iyo ka wayn waa inay fariistaan kursiga danbe.
- Carruurta u dhow boorsada hawada ayaa khatar ku jira, gaar ahaana kuwa u dhow kuraasta badqabka ilmaha ee gadaal u jeeda. Ha saarin ilmo dhashay horta kursiga hore ee gaariga leh boorsada hawada ee geeska rakaabka.
- Dhammaan darawallada ama rakaabka kuraasta hore, gaar ahaana dadka gaaban, uurka leh, ama waayeelka ah waa inay fariistaan kuraasta danbe ee fog inta suuragalka ah ayna ka fogaadaan isteerinka ama shirka.

**Adeegsiga Suumanka amaanka - rakaabka, darawallada.**

**1. Qeexitaannada.**

- "Kursiga amaanka ilmaha" waxaa laga wadaa kursiga amaanka ilmaha ee buuxinaaya shuruudaha ku qoran Heerarka Badqabka Gaariga ee Federaalka.
- "Nidaamka xirista ilmaha ee federaalku aqoonsan yahay" waxaa laga wadaa nidaamka suumanka xiraaya ilmaha gaariga saaran kaasoo loo sameeyay in ilmaha kor loogu qaado si loogu sahlo in ilmuhu si sax ah ugu fariisto nidaamka federaalku aqoonsan yahay ee suunka amaanka ee dhabta iyo garbaha qabta kaasoo buuxinaaya shuruudaha Heerarka Amaanka Gaariga ee Federaalka.

**2. Carruurta Kayar 55 Rodol.** Marka ilmo miisaankiisu ka yar yahay 55 rodol lagu wado gaari kaasoo ay ka dooneyso Waaxda Gaadiidka ee Mareykanka inuu lahaado suumanka amaanka, darawalku waa inuu ilmaha si sax ah ugu xiraan kursiga amaanka ilmaha.



**3. Rakaabka ka yar da'da 18 sano jirka;**

- Darawalka ayaa xaqiijin doona in cunuga miisaankiisu yahay ugu yaraan 55 rodol laakiin ka yar 80 rodol kaasoo kayar 8 sano jir si sax ah loogu xiro nidaamka xirista ilmaha ee federaalku ogol yahay.
- Darawalku waa inuu xaqiijiyo in ilmaha kayar 18 sano jir laakiin ka wayn 8 sano ama kayar 18 sano kana balaaran 4 fiid, 9 inji dheerar ahaan si sax ah loogu xiro suunka kursiga iaa in ilmuhu u baahan yahay maahee nidaamka suunka ilmaha ama kursiga badqabka ilmaha.
- Darawalka ayaa xaqiijin doona in ilmaha kayar 12 sano oo miisaankiisu ka yar yahay 100 rodol si sax ah loo xiro kursiga danbe ee gaariga, haddii ay suuragal tahay.

**4. Rakaabka kale ee jira 18 sano iyo ka wayn; darawallada.** Marka qof jira 18 sano ama ka wayn uu yahay rakaabka gaari ay Waaxda Gaadiidka Mareykanku ka doonayo inuu lahaado suumanka amaanka rakaabkaas waa in si sax ah loogu xiraa suunka amaanka. Wadaha gaariga ay ka dooneyso Waaxda Gaadiidka ee Mareykanka inuu ahaado suumanka amaanka waa inuu sidoo kale si sugan u xirtaa (darawalka) suunka amaanka.

**5. Shardi Dhaafyada.**

- Qaadaha boostada miyiga ee Adeegga Boostada ee Mareykanka ayaan laga dooneyn inuu suunka amaanka xirto marka uu boostooyinka qaybinaayo.
- Darawalka tagsiga ama limousine ayaan masuul ka ahayn xirashada suunka amaanka ee rakaabka uu ku wado gaariga lacagta ah.
- Qofka qaada wargaysyada ayaan laga doonayn inuu xirto suunka amaanka inta uu sido wargaysyada uu ku wado gaariga ama uu samaynaayo waajibaadka gaynta wargayska ee u baahan inuu marar badan ka degto oo soo fuulo gaariga.

## Su'aalaha Muraajacada ah ee Qaybta 4:

1. Dadka waawayn iyo carruurta Maine e da'dee dhan ayaa laga doonayaa inay xidhaan suunka amaanka ama lagu xiro kursiga amaanka ah marka ay saaran yihiin gaari?
2. Run mise been? Suunka amaanka kursiga ayaa ku siinaaya feejignaan.
3. Ku dhawaad meeqa dad ah ayaa sanad kasta ku dhinta shilalka gaariyaasha gudaha Mareykanka?
4. Run mise been? Haddii gaarigaagu leeyahay boorsada hawada markaas adeegsiga suumanka amaanka ayaan loo baahnayn.
5. Run mise been? Marka si sax ah loo adeegsao suumanka amaanka ee dhabta iyo garbaha ayaa yareyn kara khatarta dhaawaca daran ama geerida 40-55%.
6. Maxaa loogu talinayaa in darawalku gadaal ugu fariisto kursiga si ay markaas u jirto ugu yaraan badka 10 inji oo u dhexeeya jirkiisa iyo isteerinka?

QAYBTA 5

# Bilaabida

## Kicinta Matoorka



Eeg buugaaga tusmada mulkiilaha si aad u hesho sida loo kiciyo gaariga. Xaqiiji in gaarigu ku jiro "P" (baakin). Si aad u kiciso gaariga, saar bareega, ku wareeji furaha booskiisa si aad u hubiso nalalka iyo cabirada (heerka shidaalka, ABS, boorsada hawada, iwm.). Ku rog furaha si aad u kiciso (u shido matoorka), shin nalalka iftiinka yar, kadibna xir albaabada.

## Horay u Socoshada

Geli gaariga marxalada "D" (wad).  Hortaada eeg oo iska fiiri gaadiidka kaa xiga geesaha iyo gadaal. Fareejo bixi kadibna si tartiib ah u dhaqaaqa. Qaybta hore ee cagtaada waa inaad saartaa sheelaraha gaaska halka ciribtaadu saarnaanayso sagxada.

**Habraacyada Hadda ee Shaqada: Gayrka Gacanta**

Qaybta ugu muhiimsan ee shaqada fudud waa inaad barato dareenka isqabadka. Tan waa marka, marka aad ka fuqdo sheelaraha, matoorka iyo gayrku wada shaqeynayaan. Marka aad gayrka geliso, waa inaad isku aadisaa dhaqaaqa horey (ama gadaal) ee gaariga adoo kordhinaaya cadaadista sheelaraha gaaska.
Raac talaabooyinkaan si aad gaariga u dhaqaajiso:

1. Riix sheelaraha bareega adoo saaraaya cagaada midig. Cagtaada bidix, hoos ugu riix sheelaraha dhanka sagxada.
2. Aad gayrka koobaad.
3. Siidaa bareega baakinka.
4. Daar fareejadaada leexashada si aad u muujiso jihada aad dooneyso inaad u dhaqaaqdo.
5. Ka fiiri gaadiidka gadaashaada iyo miraayad haadyada. Iska fiiri geesaha garbahaaga si aad iskaga eegto waxyaabaha aadan u jeedin.
6. Si tartiib ah u siidaa gayrka ilaa uu ka gaaro bar islisida. Xasuusnoow inaad eegto dhanka wadada aadana eegin cagahaaga ama gacmahaaga!
7. Ka qaad cagtaada midig bareega oo saar sheelaraha.
8. Adoo tariib hoos ugu riixaaya sheearaha, si tariib ah kor ugu qaad sheelaraha gayrka ilaa meesha ugu saraysa.

Haddii garigu horay u boodo, waxaa midkood si kadis ah u siidaysay gayrka, ama waxaad aad u riixday sheelaraha gaaska. Haddii gaarigu raqleeyo matoorkuna qayliyo, shidaal ku filan ayaan kuugu jirin matoorka.

**Sidee ayaad u adeegsan kartaa midkasta oo kamid ah gayrarka hore?**

Xulashadaada gayrarka ayaa ku xiran awooda iyo xawaaraha aad u baahan tahay shaqooyinka kaladuwan ee gaari wadista. Gayrka koobaad ayaa ku siinaaya awooda aad u baahan tahay si aad gaariga u dhaqaajiso. Gayrka labaad ayaa kuu sahlaaya inaad socoto 15 ilaa 25 mph, ayadoo ku xiran awooda matoorka iyo in gayrku uu yahay xawaaraha 3,4, ama 5. Waxaad sidoo kale u adeegsan kartaa gayrka labaad si aad u biloowdo gaari ku jira baraf ma ugu wado baraf culus. Gayrka sadexaad, gaariyaasha leh xawaaraha gayrka 3, ayaa caadiyan loo adeegsadaa dhammaan xawaareyaasha ka badan 25 mph. Haddii gaari uu leeyahay

xawaaraha 4- ama 5 ee gayrka iyo matoor yar, kan sadexaad ayaa loo adeegsadaa xawaareyaasha 30 ama 40 mph. Adeegsiga gayrka afraad waa marka aad gaari ku wadayso xawaare ka badan 35 mph wado siman. Marka aad gaari ku waydayso taag, waxaad u baahan tahay inaad gaarto 40 mph ama ka badan kahor inta aadan u wareegin gayrka afraad ama shanaad.

**U wareegista gayr sareeya**

1. Sheelaree si aad u kordhiso xawaaraha ku haboon gayrka aad dooneyso inaad ku socoto.
2. Hoos u riix sheelaraha gayrka.
3. Siidaa sheelaraha.
4. U wareeg gayrka xiga ee ka sareeya.
5. Markale riix sheelaraha. Qayb ahaan siidaa sheelaraha.
6. Siidaa sheelaraha oo dhan si aad u sii wado inuu xawaareeyo.

**Gelinta Gayr Hoose**

Waxaa jira sababo kaladuwan oo aad gayr hoose u gelinayso: si aad u hesho awoodo, u xawaareyso, si hufan ugu dhaqaaqdo, tariib ugu wado gaariga marka uu dagaandag ka baxaayo (marka laga reebo marka wadadu sibiq tahay), iyo si aad u tartiibiso ama u joojiso gaariga. Si aad ugu wareegto gayr hoose, raac tilmaamahaan:

1. Siidaa sheelaraha. (Haddii aad sidoo kale doonayso inaad tartiib u socoto, riix batoonka bareega)
2. Hoos u riix sheelaraha gayrka.
3. U wareeg gayrka xiga ee hoose. (Hoos u dhigista soo boodada ah ee xawaraaha ayaa u baahan inaad u wareegto gayr intaas kasii hooseeya - marka aad si dhakhso ah bareega u saarayso iyo marka aad kasoo degayso gayrka afraad oo aad aadayso kan labaad)
4. Siidaa batoonka gayrka ilaa barta islisida adoo hoos u riixaaya sheelaraha marka aad u baahato.

**Ku haynta gaariga meeshiisa**

Barashada u dhaqaajinta gaari aan otomaatig ahayn horay kadib marka uu taagnaa meel taag ah ayaa u baahan xirfad. Si aad uga celiso gaariga inuusan gadaal u dilindiloon.

1. Ku qabo bareega baakinka.
2. Hoos u riix gayrka, kadibna u wareeg gayrka koobaad.
3. Siidaa batoonka gayrka ilaa barta islisida kadibna hoos u riix sheelaraha.
4. Siidaa bareega baakinka marka aad biloowdo inaad dareento in gaarigu horay u soconaayo.
5. Riix sheelaraha inta aad siinayso batoonka gayrka.
6. Ku sheelaree gayrka koobaad ilaa aad ka hesho xawaare ku filan oo aad ugu guurto gayrka labaad.

## Joogsiga

Ka fiiri muraayadahaaga gaadiidka kaa danbeeya. U wareeji cagtaada batoonka bareega. Si tartiib ah oo dabacsan u riix ilaa gaarigu ka istaagaayo. Haddii aad wado gaariga gayrka ah ee gacanta lagu maamulo, waxaad sidoo kale qabanaysaa gayrka marka aad istaagayso.

**Fareejaynta Marka aad Tartiib u Soconayso ama Aad Si Lama Filaan ah u Joogsanayso**

Nalalkaaga bareega ayaa dadka u sheegaaya inaad tartiib u soconayso. Haddii aad dooneyso inaad joogsato ama tartiib u socoto adoo maraaya meel darawalka kale uusan filayn, taabo batoonkaaga bareega sadex jeer ama afar jeer si degdeg ah si aad ugu sheegto darawalka kaa danbeeyay waxa aad damacsan tahay.

## Isteerinka

Markasta u leexi taayirka isteerinka dhinaca aad dooneyso inaad aado. Tan ayaa ku haboon marka aad u baxayso horay ama gadaal.

### Booska gacanta

Saar gacamahaaga isteerinka kana soo qaad inuu yahay saacad. Gacmaha saar 9 iyo 3 ama 8 iyo 4 si aad uga fogaato dhaawac kaaga yimaada boorsada hawada ee soo booda aadna u hesho xakamaynta ugu wanaagsan. Si adag u qabo isteerinka si adag oo dabacsan. Adeegso farahaaga, haku qaban calaacalaha gacmahaaga marka aad isteerinka leexinayso. Suulkaagu ka joogo meel la siman wajigaaga ee isteerinka. Si aad u xakamayso gaariga marna ha qaban dhexda isteerinka marka aad gaari wado.

## Gadaal U Bixida

Si aad gadaal ugu baxdo si amaan ah:

- Eeg gadaasha gaariga kahor inta aadan fuulin. Carruurta ama waxyaabaha yaryar ayay adag tahay in laga arko kursiga darawalka.



- Kici gaariga. Ku qabo bareega oo kici gaariga. Ku qabo isteerinka mareegta 12 oo gaw ah gacantaada bidix. Saar gacantaada midig dhabarka danbe ee kursiga rakaabka kadibna ka fiiri muraayada gadaale. Muraayadahaaga ayaan muujinayn si toos ah aaga ka danbeeya gaarigaaga kaamirada gadaalena waxay muujinaysaa muuqaalka kooban si aadan keliya iskugu halayn muraayadahaaga ama kaamirada gadala u bixida inta aad dib u baxayso.



- Tartiib gadaal ugu bax. Way adag tahay inaad isteerinka maamusho marka aad gadaal u socoto. Isteerinka u wareeji jihada aad rabto in gaarigu u baxo. Haddii aad leexanayso adoo gadaal u baxaaya, si dhakhso ah u hubi horta iyo geesaha. Dib u bax xawaare aan ka badnayn socod gaabis ah. Sii wad inaad gadaal eegto ilaa aad si buuxda u istaagto.

Sabab la xiriirta inay adag tahay inaad wax aragto marka aad gadaal u baxayso, iskuday inaad samayso dib u bixid kooban sida ugu macquulsan. Iska ilaali inaad dib ugu baxdo gaari kaa danbeeya. Marka aad galayso wadada ama aaga baakinka, dib ugu gal ilaa in boorku diidaayo maahee. Qaabkaas wuxuu kuu sahlayaa inaad horey u bacdo marka aad baxayso.

## Ilaalinta

Isla ilaali taagnaanta xad dhaafka ah. Gaariga caadiga ah wuxuu isticmaalaa hal koob oo gaas ah lixdii daqiiqo kasta marka uu taagan yahay asagoo shidan. Marka aad joojiso ama kiciso gaariga, ha taagnaan wax ka badan daqiiqad. Tartiib u wadista dhawrka daqiiqo ee hore ayaa ah qaab tashiilan oo aad matoorka ku kululaynayso. Inaad taagnaato gaariga oo shidan ayaa qasaarisa qiyaastii 6 bilyan oo galaan oo shidaal ah sanad kasta. Waxay abuuraysaa maadooyinka wasaqda ah ee keena kansarka; cudurada wadnaha iyo sanbabada, sida neefta; iyo sidoo kae kobaca maskaxda naafada ah ee carruurta iyo daciifka garaadka ee dadka waayeelka ah. Goballo, degmooyin, iyo maamullada magaallada (ayna ku jiraan qaar kamid ah Maine) ayaa leh sharciyo xadidaada gaariyaasha ayagoo istaaran taagan.

## Su'aalaha Muraajacada ah ee Qaybta 5:

1. Maxaa loogu talinayaa in aad isteerinka ka qabato 3 iyo 9?
2. Run mise been? Xeerka u leexinta isteerinka jihada aad dooneyso inaad aado ayaa qabanaya marka aad horey aadayso keliya.
3. Sidee ayaad ugu sheegi kartaa darawallada kaa danbeeya marka aad dooneyso inaad tartiib u socoto ama si lama filaan ah u istaagto?
4. Run mise been? Cagtaada oo dhan waa inaad saartaa marka aad riixayso batoonka gaaska.
5. Marka gaari caadi ah uu iska taagan yahay asagoo daaran gaas intee dhan ayuu isticmaalaa 6 daqiiqo kasta?
6. Marka aad gadaal u bixinayso gaarigaaga xawaare intee dhan ayaad ku dhaqaaqaysaa?

QAYBTA 6

# Xeerarka Wadada

## Wadista Gaari

Wadista gaari waa masuuliyad aad u wayn xeerarka iyo tilmaamaha keliyana kuma filna inaad noqoto darawal wanaagsan. Inkastoo ilaalinta sharcigu muhiim tahay, si aad u noqoto darawal wanaagsan waa inaad sidoo kale yeelataa fikirka caawinta dadka kale iyo sidoo kale dareenka wayn oo masuuliyadeed.

Sharciyada iyo habraacyada sharciga waxaa loo sameeyay si looga hortago shilalka loona socodsiiyo gaadiidka. Ku dhaqanka sharciyadaan ayaa markasta wax badan u taraysa inaad noqoto darawal amaan ah oo masuuliyad leh. Hase yeeshee, waxaa jira, khatar la xiriirta gaari wadista oo dhan. Si loo yareeyo khatartaan, waa inaadan isku halayn keliya sharciga, laakiin aad sidoo kale feejignaan u yeelataa wax kasta oo aagaaga ka socda.

Qaybaha soo socda waxay soo koobayaan sharciyada taraafiga iyo farsamooyinka gaari wadista masuuliyada leh iyo habraacyada.

## Waddo Marida U Xaq Leh

Xeerarka wado siinta ayaa kuu sheegaaya adiga iyo darawallada kale sida aad u soconaysaan. Marka aysan jirin boorar, astaamo, ama booliis xeerarka degsan ayaa go'aaminaaya cida wadada xaq u leh marka labo wado ama ka badan kulmaan. Sidoo kale waxay daboolayaan xaaladaha kale.

Inkastoo xeerarka xaqa wadada ay leeyihiin awooda sharci fulinta, darawal wanaagsan ayaan marna isku halayn si gaar ah xeerarkaas si uu u badbaado. Darawalka leh xaqa wadada waa inuu u adeegsadaa si dareen leh, uusana markasta ku adkaysan. Marna ha iska aaminin inaad leedahay xaqa wadada. Markasta fiiri xaalada oo ka fakar badqabkaaga.

Sii xaqa wadada:

Xeerka Iskugu Imaanshaha Kala-goyska Iskumar



- Marka uu yimaado astaanka 4 irdoodka ah, darawalka koobaad ee soogala isgoyska ayaa ugu hor baxaaya (dabcan waa qasab in dhammaan gaariyaashu joogsadaan).
- Haddii labo gaari ay galaan isgoyska iskumar ayagoo ka kala yimid wado iskasoo horjeeda midkoodna labada darawal uu bixinaayo fareejada leexashada, xaqa wadada waxaa leh gaariga toos u baxaaya.
- Darawalka kaa xiga dhankaaga midig ee isgoyska afar irdoodka ah ayaa xaq u leh wadada haddii labadiinuba soo galaan meesha iskumar adinkoo isfeer socda.

- Gaariga kasoo galaaya wadada gaarka ah waa inuu boos siiyaa gaari kasta ama dadka lugaynaaya ee maraaya wadada dadwaynaha. Haddii aad galayso wado ama jid wayne waa inaad gashaa adoo aan carqalad gelin gaadiidka kale.




- Darawallada marhoreba ku socda wadada wayn ee goballada isku xirta, haddii aad marayso geeska wadada lagasoo galo, ayaa xaq u leh wadada.

- Sug dhammaan gaariyaasha socda inay ku dhaafaan marka aad kasoo dhaqaaqayso baakinka.

- Ha baasin gaari kasta oo u istaagay dad goynaayay wadada.

- Haddii labo gaari iskumar soo galaan isgoys aan la maamulin, boos sii gaariga midigta kaa xiga.

- Marka aad soo galayso isgoys, sii xaqa wadada gaariyaasha horay ugu jiray isgoyska.

- Marka aad galayso isgoys wareegsan, gaariga meesha wareegsan ugu horeeyay ayaa ugu hor baxaaya.

- Waa inaad boos siisaa gaariyaasha Gurmadka degdega ah ee ka imaanaaya jiho kasta marka ay yeeriyaan seeriga ayna bixinayaan nalka falaashka ah. Waa inaad si degdeg ah ugu wadaa dhanka midig ee wadada, aad banaysaa isgoys kasta, aadna joogsataa haddii gaariga gurmadku ku baasaayo. Ku fashilmida Sameynta Sidaas ee waa danbi Heerka E ah.

- Darawallada gaariyaasha ee u leexanaaya bidix waa inay boos siiyaan darawallada baaskiilka iyo kabaha taayirada leh ee ka imaanaaya jihada kasoo horjeeda, umana leexan karaan bidix marka ay xaaladahaas jiraan ilaa inay sidaas u sameeyaan maahee qaab amaan ah iyo ayagoo aan carqalad gelin shaqada darawalka baaskiilka/kabaha taayirada leh.

Marka ay tahay inaad ka istaagto dadka lugaynaaya:

- Marka dadka lugaynaaya ay marayaan meesha calaamadeysan ee dadku wadada ka gooyaan aysana jirin nalalka taraafiga ama booliis jooga isgoyska.
- Marka gaarigu u leexanaayo gees dadka lugaynaayana ay wadada goynayaan ayadoo nalku shidan yahay.
- Marka gaarigu goynaayo geeska wadada ee lagu socdo. Gaari kasoo baxaaya wadada geeska ama luuq waa inuu istaagaa kahor inta inuusan goyn isgoyska uuna sugaa dadka lugaynaaya iyo gaariyaasha.
- Markasta boos sii carruurta galaysa dugsiga ee goynaysa wadada.

## Xakamaynta Gaadiidka

Xakamaynta gaadiidka waxaa ku jira fareejooyinka wadooyinka, calaamadaha, iyo sumadaha wadada. Waxaa sidoo kale ku jiray tilmaamaha booliiska, shaqaalaha wadooyinka iyo ilaallada isgoysyada. Darawal ayaan ku wadi karin gaari aaga baakinka si uu uga fogaado ku dhaqanka shuruudaha aaladaha xakamaynta gaadiidka.

## Tilmaamaha Taraafikada

Nalalka taraafiga ayaa caadiyan ku xiran dhammaan isgoysyada. Waxay leeyihiin midabyada casaan, jaalle, iyo cagaar kor ilaa hoos.  Haddii nalalka taraafigu siman yihiin, casaanka ayaa xiga geeska bidix, jaallaha ayaa ku jira dhexda halka cagaarku ugu xigo geeska midig. Meelaha qaar ayaa leh nalalka keliga ah ee cagaar, jaalle ama casaan ah.





***Nalka Taraafiga ee CAGAARAN:*** **SOCO.**  Horay ayaad u socon kartaa haddii aysan wadada ku go'nayn gaariyaal iyo dad lugaynaaya.

***Nalka Taraafiga ee JAALLAHA AH:*** **Digniin.** Nalka ayaa isku badeli raba casaan.  Biloow inaad tartiib u socoto. Nalka jaallaha ah wuxuu baneeyaa isgoyska kahor inta aan nalka cas shidmin.

***Nalka Taraafiga ee CASAANKA AH:*** **JOOGSO.** Waa inaad istaagtaa kahor inta aadan gelin isgoyska. Waa inaad istaagtaa gadaasha laynka joogsiga ama dadku wadada ka gooyaan ilaa nalku noqonaayo cagaar.  U leexashada dhanka midig ayadoo nal cas shidan yahay waa xaaraan, kadib marka aad istaagto, ilaa in tilmaantu sheegayso maahee. Gaariga midig u leexanaaya ayadoo nal cas shidan yahay waa inuu wado siiyaan dadka lugaynaaya iyo dhammaan gaariyaasha.

***Fareejada Nalka Taraafiga ee JAALLAHA AH*** – Tartiib oo si taxar leh u soco.  U diyaar garoow inaad istaagto daqiiqad kasta. Nalka jaallaha ah oo fareejaynaaya ayaa sidoo kale laga heli karaa aagaga dhismaha iyo qaar kamid gaariyaasha iyo sidoo kale qaar kamid ah isgoysyada.

***Fareejada Nalka Taraafiga ee CASAANKA AH*** –Joogso oo eeg labada geesba kahor inta aadan gelin isgoyska. Mararka qaar nalalka cas ee fareejaynaaya ayaa muujinaaya isgoyska wadada tareenka. Mararka qaar isgoysyadaas ayaa leh albaabo ama difaacyo. Joogto oo sug ilaa nalka fareejaynaaya ka joogsado difaacyadana meesha laga qaado kahor inta aadan socon.

**Falaaraha Nalka leh**

Midabka falaarta nalka leh ayaa muujinaysa isla waxa uu muujiyo nalka taraafigu.

**Nalka cas ee leh falaarta cagaaran ayaa ka dhigan** inaad si taxadar leh u socon karto jihada falaarta, adoo boos siinaaya dhammaan gaariyaasha kale iyo dadka lugaynaaya.

**Falaarta xasiloon ee jaallaha ah** ayaa ma saarta gaariyaasha leexanaaya isgoyska kahor inta aan nalku noqon casaan.

**Falaarta xasiloon ee Cagaarka ah** ee kor u jeeda ayaa laga wadaa toos u soco.

**Falaarta xasiloon ee Casaanka ah** ayaa laga wadaa in u leexashada dhanka falaartu muujinayso ay qasab tahay in la istaago ilaa falaartu isku badelayso jaalle.

Marka uu jiro wax ka badan hal nalka taraafiga ah raac midka sida tooska ah u quseeya laynkaaga.



***Nalalka Xakamaynta Isticmaalka Laynka:*** Nalalka gaarka ah ee kaa koreeya ayaa mararka qaar loo adeegsadaa in la muujiyo seedadka wadada wayn ee ay tahay in la adeegsado wakhtiyada qaar:

**Nalka Midabka Cas ee "X":** Haku wadin gaariga laynkaan.
**Nalka Midabka Jaallaha ee "X":** Ka bax laynkaan, nalka ayaa isbadeli raba.
**Falaashka Jaallaha ah ee "X":** Laynkaan ayaa keliya loo adeegsan karaa u leexashada dhanka bidix.
**Falaarta Cagaaran:** Waad raaci kartaa laynkaan.

## Calaamadaha Taraafikada

Calaamadaha Taraafikada ayaa kuu sheegaaya xeerarka, khataraha, iyo goobaha wadada. Waxay sidoo kale ku siinayaa jihooyinka wadada wayn waxayna muujinayaan meesha adeegyada wadadu ku yaalaan.

***Calaamadaha Digniinta*** - Calaamadahaan ayaa ka digaaya khatar kaa horaysa. Caadiyan waxay leeyihiin qaabka dheemanka. Caadiyan waa kuwo leh far jaalle ama madow ah ama calaamado. Calaamadaha ugu badan qaarkood:



Isgoys ayaa Kaa horeeya



Wadada Geeska ayaa kaa Horaysa



Isgoyska T ayaa Kaa horeeya




Aaga Baasid La'aanta



Wadada Dalcad ah ayaa kaa Horaysa



Dalcada Midig



Jidka wayn ee Labada qaybood ah ayaa Bilaabanaaya



Jidka wayn ee Labada qaybood ah Dhammaanaysa



Dhammaadyada Laynka



Gaariyaal Soo galaaya wadada



Laynka Lagu Daray



Calaamada taraafiga ayaa Kaa Horaysa



Calaamada Joogsiga ayaa kaa Horaysa



Dalcad Dheer ayaa Kaa horaysa




Talo Ku aadan Xawaaraha Dalcada



Aaga Dugsiga



Isgoyska dadka lugaynaayo




Wadada la Wadaag Baaskiilada



Baaskiil ayaa Goynaaya



Waa sibiq Marka ay Qoyan tahay

***Isgoyska wadada Tareenku***- Inta badan isgoysyada wadada tareenka ayaa leh calaamado ama tilmaamo. Kuwa ugu badan:




- Calaamada digniinta wareegsan ee jaallaha ah oo ay ku qoran tahay “X” iyo “RR” madoow. Calaamado waxay kaaga digaysaa inaad tartiibsato, eegto aadna dhagaysato tareen ama gaariga tareenka oo soo socda. U diyaar garoow inaad joogsato.
- Calaamada cad, ee qaabka X oo ay ku qoran tahay “Railroad Crossing (Isgoyska Wadada Tareenka).” Haddii tareen ama gaariga wadada taleefanka  uu soo socdo waa inaad joogsataa gadaasha laynka joogso ama kahor inta aadan gaarin isgoyska.

- Isgoysyada leh wax ka badan hal wado tareen tirada seedadka ayaa lagu dhajin karaa meesha. Maaha in dhammaan isgoysyada leh wax ka badan hal layn ay leeyihiin calaamadahaan marka markasta raadi wax ka badan hal layn, tareen, ama gaariga wadada tareenka isgoys kasta.




Marka aad goynayso isgoyska wadada tareenka, eeg labada gees ee isgoyska si aad u eegto tareen soo socda. Ha ku istaagin dhexda wadada tareenka. Haddii tareenku uu wadada goynaao, sug ilaa tareenku ka dhamaanaayo wadada kahor inta aadan horay u socon. Haddii ay jiraan nalal iyo albaabo, sug ilaa inta ay ku fasaxayaan. Hadday qasab tahay inaad u istaagto gaariyaasha ama tilmaan u dhow isgoyska wadada tareenku marto, ku sug aaga joogsiga kahor inta aadan gaarin wadada tareenka (ha dhex istaagin wadada tareenka).

***Calaamadaha Aaga Shaqada*** - Waa dheeman oranji ah ama calaamado u samaysan afar gees oo leh xarfo ama astaamo madoow. Calaamadahaan waxay kuu sheegayaan aagaga shaqada iyo dadka ka shaqeynaaya aaga wadada. Digniinaha waxaa ku jira shaqaale kaa horeeya, xawaare dhimis, wado kala leexata, mashiinka wadada oo gaabis ah ama isbadellada dusha wadada.




| Dhisme wado ayaa Kaa horeeya | Shaqaale ayaa kaa Horeeya | Wado Dhisme Ku socdo ayaa kaa Horaysa | Wado Hal layn ah ayaa Kaa horaysa | Wado meelo kaladuwan u kala leexata |
|---|---|---|---|---|

Calaamada calanka ayaa u sheegaysa gaariyaasha aaga shaqada. Waa inaad raacdaa tilmaanta calaamada calanka.

Jaajuuro ayaa kaa hor istaagaaya inaad gasho wadooyinka xiran ama aagaga kale ee khatartu ka jirto. Haddii uu jiro tilmaan kooban oo wado, ku joogso laynka cad (haddii uu jiro.)







| Fuusto | Toobin | Tuubo | Jaajuurka | Wado Xiran |
|---|---|---|---|---|

Tartiib u soco aaga shaqada oo diyaar u ahow inaad degdeg u istaagto.  Hoosta haka gelin. Ganaaxyada xawaare ku marista aaga shaqada ayaa ah mid labo jibaar ah.

***Calaamadaha Sharciga***- Calaamadahaan waa isku weer, afar gees, ama waxay yeelan karaan qaab gaar ah. Waa kuwo cad oo wata xarfo ama astaamo madoow, cas, ama cagaaran. Calaamadahaan waxay kuu sheegayaa tilmaanta wadada, isticmaalka laynka, leexashada, xawaaraha, baakinka, iyo xaaladaha kale. Calaamadaha qaar ayaa leh mareegta cas oo leh firdhis cas oo calaamada ku yaala. Tan ayaa ka dhigan in aadan samayn karin waxyaabaha qaar.

Calaamadaha Sharciga ah ee ugu Badan waa:


Ha u leexan Bidix


Ha u leexan Midig


U Laaban Gadaal


Toos


U leex Bidix Keliya


Toos ama Midig U leexo




**Calaamadaha Xadiga Gaarka ah** - Calaamadahaan cadaan iyo casaanka ah ayaa muujinaaya xawaaraha sharciga ah haddii xaaladuhu saamaxayaan.




**Calaamada Joogsiga** - Calaamadaha joogsigu waxay leedahay sideed gees (sideed xagal) waana mid cad oo qoraal cad leh.  Waa inaad istaagtaa gadaasha laynka joogsiga ama isgoyska dadka lugaynaaya haddii uu jiro. Haddii uusan jirin meel dadku goynayaan ama laynka joogsiga, istaag meesha ugu dhow isgoyska si ay kuugu suuragasho inaad aragto gaadiidka soo galaaya wadada isgoyska.  Istaaga waa in la sameeyaa kahor inta aan wax kamid ah gaariga aysan gelin isgoyska. Haddii ay tahay joogsiga wado afar irdood ah, sug tookadaada. Si kastaba waa inaad sugtaa ilaa ay amaan tahay kahor inta aadan dhaqaaqin.  Eeg gaariyaasha iyo dadka lugaynaaya oo, haddii ay jiraan, sii boos ay maraan.




**Calaamada Wado siinta** - Calaamada boos siintu waa sadex xagal casaan iyo cadaan ah oo hoos u jeeda taasoo leh xarfo cas (qaar kamid ah calaamadaha duqoobay ayaa wali lahaan kara midabka jaalaha ah ee leh xarfaha madoow).  Waxay ka dhigan tahay inaad tartiib u socoto aadna sugto gaariyaasha inay ka baxaan wadada aad galayso ama isgoyska. Waa inaad tartiib u socotaa aadna boos siisaa gaariyaasha ama dadka lugaynaaya ee leh xaqa wadada kahor inta aadan horey u socon.




**Laynka Dhexe ee Wadaaga ah - Leexashada dhanka Bidix keliya** – Calaamadahaan ayaa muujinaysa layn keliya loogu talo galay keliya gaariyaasha bidix u leexanaaya. Looguma talo gelin gaadiidka toos u socda ama gaariyaasha baasaaya. Gaadiidka u socda labada jiho midkood ayaa adeegsan kara laynkaan.




**Wado hal jigo ah** - Gaariyaasha ayaa u soconaaya keliya halka jiho ee falaarta.  Ha u leexan jihada kasoo horjeeda falaarta.  Marna dhinaca khaldan ha u raacin wadada halka jiho ah.

Haddii aad aragto booliis hagaaya gaariyaasha, raac amarkooda. Booliisku waxay awood u leeyihiin inay hagaan dhammaan gaadiidka iyo dadka lugaynaaya marka loo baahdo. Waa sharci daro inaad diido ama ku fashilanto ku dhaqanka amarada booliiska. Waxaad ku lumin kartaa shatiga inaad iskudaydo inaad ka cararto ama ka fakaro sarkaalka booliiska. Marka booliisku aysan joogin, calaamadaha wadada iyo tilmaamaha ayaa awood ku leh sharciga. Waa sharci daro inaad bixiso ama jabiso calaamadaha wadada.

***Calaamadaha Tilmaanta*** **-** Calaamadahaan ayaa ah isku weer ama afar gees iyo cagaar, baroon, ama buluug.  Waxay kaala talinayaan wadooyinka isgoyska. Waxay kaa caawinayaan inaad tagto magaalooyinka. Waxay calaamadeeyaan qaybaha isgoyska.  Waxay sidoo kale kaa caawin karaan inaad hesho isbitaallada, astaannada adeegga, maqaayadaha, iyo hudheellada.









***Calaamadaha Lambarka Wadada*** - Qaabka iyo midabka calaamadaha wadada ayaa muujinaaya nooca wadada:  wadada goballada, wadada Mareykanka, gobalka, magaallada, degmada, ama deegaanka. Marka aad qorsheynayso safar, adeegso qariirad ama GPS si aad u go'aansato wadada.  Inta aad safrayso, raac calaamadaha wadada si aad uga hortagto inaad ku lunto aag aadan aqoon.



Wadada Golabada isku xidha



Wadada Maraykanka



Wadada Gobalka

## Calaamadaha Geeska Wadada

Calaamadaha ku qoran wadada ayaa ku siinaaya tilmaamo ama digniino. Waxay qaybiyaan seedadka waxayna ku tusayaan meesha aad ku baasi karto gaariyaasha kale ama ku badeli karto laynka. Waxay sidoo kale asteeyaan seedadka leexashada iyo meelaha dadka lugaynaaya wadada ka gooyaan. Waxay muujiyaan meesha aad istaagayso calaamadaha ama tilmaamaha wadada.

### *Calaamadaha Laynka Jaallaha ah*



Wado lagu jiho ah,
baasida waa la ogol yahay



Wado lagu jiho ah,
baasida waa la ogol yahay marka seedka dhibcaha ah ayaa geeskaaga xiga



Wado lagu jiho ah,
baasida lama ogola labadaba tilmaamaha

*Calaamadaha Laynka Cad*



Wado Hal jiho ah,
baasida waa la ogol yahay

## Adeegsiga Seedadka

Seedadka kaladuwan ee gaadiidka waa in loo adeegsadaa ujeedooyinka kaladuwan, waxaa jira seedad loogu talo galay gaadiidka tooska u socda, kuwa baasaya iyo kuwa leexanaya.

***Seedadka gaadiidka Toos U socda:*** Inta lagu jiro gaari wadista caadiga ah, ku soco seedka ugu saxamada yar - kan leh istaaga iyo biloowga ugu yar. Gaari wadista sahlan ayaa kuu sahlaysa inaad ka fogaato gaariyaasha kale. Waxay sidoo kale kuu badbaadinaysaa gaaska.

Haddii ay jiraan sadex seed ama ka badan oo u wada socda isku jiho, seedka dhexe, ama seedadka, ayaa caadiyan ugu sahlan. Seedka bidix waxaa loogu talo galay darawallada baasaaya ama u leexanaya bidix. Seedka midig waxaa isticmaala darawallada tartiib u soconaaya ama galaaya ama ka leexanaaya wadada.

Haddii wadadaadu leedahay keliya labo seed oo isku jiho u socda, seedka midig ayaa leh isku socodka ugu fudud. Hase yeeshee, qaar kamid ah wadooyinka ayaa leh seedadka u leexashada bidixda oo gaar ah oo ku yaala isgoysyada. Tan ayaa sahasha in gaadiidku si dabacsan ugu socdo labada gees ba.

***Seedadka Baasida:*** Si guud, waa inaad ka baasto seedka bidix. Ka baasida dhanka midig ayaa khatar ah waayo darawallada kale ayaan filanayn. Gaariyaasha geeska midig ayay sidoo kale adag tahay in darawada kale arkaan.

- Ha baasin marna gaari adoo maraaya geeska lagu socdo ee wadada ama aaga guud ee safarka wadada.
- Marna ha baasin gaari adoo raacaaya seed lagu asteeyay boor rasmi ah ama aalada xakamaynta gaadiidka kaasoo ku xadidaaya seedka dhexe leexashada keliya.

Marna haka baasin gaari dhanka midig marka laga reebo:

- Marka gaariga aad baasayso uu u leexanaayo dhanka bidix uuna jiro boos u banaan in labo seed ama ka badan oo u socda isla jihada.
- Marka gaariga aad baasayso uu ku socda seedka dhanka bidix ee wadada ama jid waynaha leh labo seed ama ka badan oo muujinaaya in gaadiidku u socdaan isla jihada.

**Xadidaada Seedka**

Qayb kasta oo kamid ah Maine Turnpike ama wadada Goballada ee 95 oo leh sadex seed oo u socda labo jiho midkood, taraagyada, ayna ku jiraan baal doosyada, laakiin aysan ku jirin taraagyada alaabaha qaada ayaa keliya ku socon kara labada seed ee geeska midig ee ugu fog.

***Seedadka Leexashada:*** Qaabka ugu amaansan ee loo leexdo waa inaad goyso dhawr seed oo wadada inta aad awoodo. Halkaan ayaad ka helaysaa labo xeer oo ku caawinaaya:

**Ka biloow seedka ugu dhow meesha aad dooneyso inaad aado.** Haddii aad u leexanayso geeska bidix raac laynka ugu dhow dhexda, u bax dhanka dhexda ee isgoyska oo sug adoo taayiradu kuu toosan yihiin, ilaa ay kaaga suuragalayso inaad leexato. Ku soco geeska bidix ee dhexda marka aad leexato oo ku leexo seedka ugu bidixeeya ee aadaaya jihadaada. Marka aad midig u leexanayso, ka biloow seedka ugu midigeeya una dhawoow cirifka dhammaan inta aad leexanayso.

**Marka aad samaynayso: Leexashooyinka dhanka Bidix**

1. Ka yimaada wado labo seed oo u leexanayso wado labo seed ah.
2. Ka yimaada wado hal seed oo u leexanayso wado hal seed ah.
3. Ka leexanayso jid wayn oo qaybsan ilaa mid kale oo qaybsan.
4. Ka yimaada wado labo seed oo u leexanayso wado hal seed ah

1. 2. 3. 4.



**Leexashooyinka dhanka Mudug**

1. Gaariyaasha
2. Gaariyaasha Waawayn

1. 2.



**U leexo seedka ugu dhow seedka aad ka imaanayso.** Marka aad u leexanayso bidix, u leexo seedka geeska bidix ugu xiga ee aadaaya jihadaada haddii aad ku socoto wado wayn oo lao gees ah, jid 2- gees ah ama wado hal seed ah. Marka aad midig u leexanayso, u leexo geeska ugu midigeeya ee aadaaya jihadaada.

Marka aad kasoo leexanayso wadada halka seed ah, waa inaad degsataa geeska ugu geeseeya seedka bidix ama cirifka wadada. Haddii aad u baahan tahay inaad aado seed kale, samee seed badelashada keliya kadib marka aad dhamaysato leexashadaada ayna gaariyaasha kale meesha baneeyaan.

Ha leexin taayirada kahor inta aadan leexan. Haddii gadaal lagaaga dhaco, waxaa lagugu tuuri karaa gaariyaasha soo socda.

Haddii aad marhoreba marayso isgoys waa inaad horey u socotaa. Haddii ad biloowday inaad leexato waa inaad taxadartaa maadaama isbadellada sikinka ugu danbeeya ay sababi karaan shilal. Haddii aad khalad gashay, horey ugu soco ilaa isgoyska xiga oo raados qaab aad ugu laabato meeshii aad u socotay.

**Calaamadaha iyo Tilmaamaha Wadada**

Wadooyin badan ayaa leh calaamado ku tusaaya waxa seed kasta ay tahay in loo adeegsado.




Gaariyaasha ku socda seedka bidix waa inay u leexdaan bidix. Gaariyaasha ku socda seedka midig waa inay toos u socdaan ama midig u leexdaan.




Gaaritaasha ku socda seedka bidix ayaa u leexan kara bidix ama toos u socon kara. Gaariyaasha ku socda seedka dhexda waa inay toos u socdaan. Gaariyaasha ku socda seedka midig waa midig u leexdaan.

Seedadka taxan ee cad ee ku yaala wadada ayaa kala soocaaya seedadka wadada ee u socda isku jihada kuwaasoo loo adeegsanaayo waxyaabaha kaladuwan. Waxay sidoo kale diidayaan badelida seedadka. Seedadka cad ee kala googo'an ayaa muujinaaya seedadka kaladuwan ee u socda isku jihada waxayna ogolaanayaan seed badelashada amaanka ah.

***Isgoysada iyo Seedadka Joogsiga.***

Isgoysyada ayaa muujinaaya meesha dadka lugayaana ay ka goyn karana wadada. Calaamada joogsiga ama tilmaanta wadada, waa inaad istaagtaa gadaasha laynka joogsiga ama isgoyska. Haddii isgoysyad aan la calaamadin, markaas waa inaad istaagtaa kahor inta aadan gelin isgoyska meel ku filan inaad aragto gaariyaasha soo socda. Haddii uu jiro laynka joogsiga oo ka horeeya meesha wadada laga gooyo, waa inaad ku istaagto laynka joogsiga.

Halkaan ayaad ka helaysaa calaamadaha guud ee iyo astaamaha wadada laga gooyo ee caanka ah.

**Gudubfarowga**
Gudubfarowyadu waa aagag gaar ah oo loo sameeyay dadka goynaaya wadada. Waxaa badanaa lagu asteeyaa layman jaalle ama cadaan ah. Waxay noqon karaan calaamado digniin ah.
Inta badan gudubfaroga ayaa ku yaala isgoysyada, laakiin mararka qaar waxay ku yaalaan baryamaha wado.
Iska ilaali aagaga dugsiga ee baadiyaha iyo magaallada.




*Meelaha dadka Lugaynaaya Wadada ka gooyaan / Aaga Dugsiga*

Waa inaad joogsataa marka ilaallada gudub farowga dugsigu kuu sheego oo xasuusnoow inaad markasta ka istaagto carruurta dugsiga ee wadada goynaaya.




**Seedadka Joogsiga**

Seedadka Joogtsiga ayaa caadiyan lagu qoraa wadooyinka meel u dhow isgoyska si dadka lugaynaya loo siiyo meel ay maraan horta gaariyaasha taagan. Jooji gaarigaaga kahor inta aadan gaarin calaamada joogsiga ee wadada.

Marka aad gees u leexanayso, iska eeg dadka doonaaya inay wadada gooyaan. Xasuusnoow, haddii aad aragto nal cagaaran, nalka ayaa sidoo kale cagaar u ah ayagana. Waa inaad ka istaagtaa dadka lugaynaaya aga gudubfaraha, ee calaamadeysan ama aan calaamadeysnayn.

Qof **indhool** ah **ama naafo aragga ka ah** ayaa u adeegsan kara ul cad qaab uu si amaan ah oo madax banaan ugu safro. Qofkaan waxaa sidoo kale hagi kara eey tababaran. Midkay noqotabada, qofkaan ayaa markasta leh xaqa wadada. Haddii aad aragto qof wadada maraaya oo wata ul cad ama eey hagaaya, joogso ugu yaraan 10 fiid oo sug ilaa qofku ka baxaayo aaga khatarta. Darawal ku fashilmay inuu ka istaago qof lugaynaaya oo indhool ah ayaa la marsiinayaa ciqaab wado oo dhan ugu yaraan $50 iyo ugu badnaan ganaax dhan $1,000.

## Xakamaynada Kale ee Seedka

***Seedka Leexashada dhanka Bidix ee Dhexda Wadaaga ah***



Wado kasta oo ay adag tahay in si amaan ah bidix loogu leexdo, waxaa jira seedka leexashada seedka bidix oo wadaag ah kuna yaala bartamaha wadada. Marka aad ku socoto seedka wadaaga ah ee dhanka bidix loogu leexdo eeg muraayadahaaga iyo gaariyaasha kaa horeeya, fareejo u bixi dhanka bidix oo eeg gaariyaasha bidix kaa xiga. Si tartiib ah ugu leexo wadada leexashada wadaaga ah ee bidix, marka gaariyaashu baneeyaan, u leexo bidix.

*Seedadka Gadaal looga Bixi karo*Seedka labada jiho leh ayaa la adeegsan karaa saacadaha kala orodka. Seedadka ayaa lahaan kara seedadka labada xariijin ee jaalaha leh labada gees midkood. Calaamadaha ka koreeya seedadka ayaa muujinaya seedka ay amaan tahay in lagu safro. Qaar kamid ah seedadka lagu socdo ayaa loo sameeyay inay gaariyaasha ku hagaan hal jiho wakhtiyo gaar ahiyo jihada kasoo horjeeda mararka kale. Kahor inta aadan gelin seedka, hubi si aad u aragto seedadka aad adeegsan karto markaas. Falaarta cagaaran ayaa laga wadaa inaad adeegsan karto seedka. X ta cas ayaa laga wadaa inaadan adeegsan karin seedka.

## Su'aalaha Muraajacada ah ee Qaybta 6:

1. Joogsiga afar irdoodka ah, yaa xaq u leh wadada?
2. Muxuu laynka cas ee ku yaala goobinta ka dhigan yahay?
3. Waa maxay farqiga u dhexeeya laynka adag ee cad ee wadada iyo kan kala googo'an?
4. Marka aad u leexanayso seedka leexashada bidix ma lagaa doonayaa inaad iska eegto meelaha qarsoon kahor inta aadan seedka u leexan?
5. Marka aad galayso isgoysleh laynka joogsiga iyo/ama gudub faraha xagee ayaad istaagaysaa?
6. Marka aad ku leexanayso wado leh seedad badan oo jihadaada u socda seedkee ayay tahay inaad marka hore u leexo?

QAYBTA 7

# Gaari Wadista Guud

## Leexasho / leexad

Goorta la leexanayo:

- Hubi kontaroolada taraafikada, lugeeyayaasha, iyo baabuurta kale. Tilmaam leexashadaada.
- Gali haadka ugu dhow jihada aad rabto inaad aaddo.
- Foogaan fiiri intii aad awooddo markaad leexaneyso.
- Si qumaati ah u sheellaree oo hubi in tilmaanta is damiso.




*Midig u leexasho*

- Geeska bidix ha u leexin kahor midig leexashada.
- Had iyo jeer midig uga leexo qaybta midig ee haadkaaga.

*Bidix u leexasho*

- Waddo sii taraafiga hortaada kasoo socda.
- Had iyo jeer bidix uga soo leexo qaybta ugu shisheysa ee bidixda ee haadkaaga.

*Haadadka leexashada badan ee bidix iyo midig*

- Gal isla haadka aad u leexaneyso.
- Haadkaaga joog ilaa leexashada dhammaato.



## Isgoysyada

Isgoys waa meel kasta oo ay wadooyinku ku kulmaan, si hal saf oo taraafig ah u la kulmo mise uga gudbo mid kale. Waxay isugu jiraan:

- Wadooyinka istilaabka ah iyo wadooyinka dhinacyada,
- Halka laga soo galo wadada faaruqa ah,
- Waddo khaas ah iyo Afaafka xarumaha dukaamaysiga.

Waa kuwan qaar kamid ah xaararka la raaco mar kasta oo aad ku fool leedahay isgoys.




Hubi in aad labada dhinacba eegto, xitaa marka aad ka gudubto dariiq hal jiho aaddo (Qof ayaa suurtagal ah in uu waddo qaldan ku socdo).

Dhammaan goobaha isgoysyada si gaabis ah u soco adigoo raadinaya:

- kontoroolada taraafikada,
- taraafikada soo socda iyo taraafika gudbaya,
- lugeeyeyaasha iyo baskiil-wadayaasha,
- xaaladaha waddada, iyo
- waxyaabaha kaa qarin kara araga.

Ha isku hallayn kuwa kale inay adeecaan tilmaamaha taraafiga mise calaamadaha. Goobta isgoyska, eeg bidix iyo midig, xitaa haddii taraafikada kale ay leeyihiin nal casaan ah ama calaamad joogsi sababtoo ah qof ayaa suurtagal ah inuu midkood ku dheh ordo. Waxaa suurtagal ah inaadan waddo siin waddo marida u xaq leh marka looga baahanyahay sidaa darteed isku diyaari inaad iska fogeyso shil ku dhac.

Kahor intaadan dhaqaaqin joogsi kadib, hubi taraafikada iyo baskiil-wadeyaal. Eeg bidix, kadibna midig, kadibna bidix mar kale kahor intaadan galin isgoyska. Marka nalku isku badalo cagaar, hubi in jidkaaga socdaalku yahay mid cad oo aan jirin taraafik gudbaya.

Mana ha moodin in darawal kale uu ku siin doono masaafo dheeraad ah. Ha u leexan haad sababtoo ah gaariga soo socda ayaa leh tilmaaan daaran. Dareewalku waxaa suurtagal ah inuu qorsheeyo inuu leexdo kadib marka uu ku dhaafo miseba waxaa macquul ah inay illoobeen inay damiyaan tilmaamtooda.

**Hubi inaad leedahay aragti wanaagsan.** Haddii aragtidaada wadada istilaabka ah ay xannibaan dhismayaal, geedo, xayndaab mise saf gawaari baarkiman, si tartiib ah u dhaaf ilaa aad wax arki kareyso.



Wali ha leexan! Sug ilaa taraafikada kaa dhamaato.

Haddii safka baabuurta ee hal haad ay kaa xannibayso aragtidaada haadka kale, sug ilaa baabuurtu ka gudbaan. Haddii aad isku daydo inaad eegto adigoo dhinaca hore ee gaarigaaga u daweynaya haadka kale, waxa suurtagal ah in lagugu dhaco.

**Wareegga Taraafikada iyo Gooboovinka** Goobada taraafikada waa isgoys goobo ah. Goobooyinka taraafikada mise *wareegyada* ayaa mararka qaar laga dhisaa isgoys wado iyo jidad aad loogu safro. Dhammaan gawaarida kusii socota goobooyinka taraafikada mise *wareegyada* waa in ay bixiyaan waddo siin ah xaqa looga hor maro gawaarida hore ugu jirtay goobada mise *wareegga* ilaa si kale uu u amro sarkaal booliis mise aaladaha ilaalinta taraafikada. Gal wareegga adigoo u socda dhanka midig ee agagaarka buqcada dhexe ee sare u kacsan (saacadda ka soo horjeeda). Waddo lugged taag ah ee gudaha goobada ayaa awood u siinaya gawaarida inay ku gorgortamaan hareeraha buqcada yar, halka gawaaridu ay joogaan haadka safarka ee dibadda. iskuwareegyada waddooyinka ee waaweyn, loo yaqaan isgoysyada,

gawaaridu waxay sidoo kale u jalleecaan dhanka midig mise ka soo horjeeda saacada ee gaaf wareegga buqcada dhexe iyagoo si tartiib tartiib ah u socda ilaa wadada la rabo loo soo dhawaado. Darawalda waa inay bixiyaan waddo siin ah xaqa looga hor maro gawaarida ku socda dhanka bidix. Ka soo bax goobada mise *wareegga* ayaa dabadeed la sameeyaa iyadoo la samaynayo leexasho midig. Waa in aad loo taxaddaraa marka la galayo mise laga baxayo goobooyinka taraafikada mise *wareegyada* oo waxaa lagama maarmaan ah in digniin loo yeesho calaamadaha waddada weyn iyo calaamdaha waddo lugeed.

Haddii aad labo bixid gudahood ka soo leexanayso goobada wareegga rotary, waxa lagugula talinayaa inaad ku jirto haadka ugu habboon (Tan ayaa ku khusaysa haddii aan si kale lagu muujin iyadoo la calaamadaynayo wadada lugeeyaha mise calamadaha taraafikada ee tilmaamaya haadka ay tahay in la isticmaalo. Marka la isticmaalayo goobooyinka taraafikada:

- Dhin xawaaraha si aad u gasho goobada. Calaamaddan waxay kaaga digeysaa inay kaa horreyso goobada taraafikada.
- Waddo sii gaadiidka kujira goobada.
- Dhanka midig ka gal goobada gaadiidka oo raac safafka haadka.
- Tilmaam bixitaankaaga.





## Layn Baddelasho

Marka la baddelanayo haadka:

- Eeg muraayadahaaga.
- Eeg "barta aan kuu muuqan" adigoo madaxa leexinaya oo kor u eegaya garabkaaga jihada aad qorsheyneyso inaad u dhaqaaqdo. Baraha aan muuqan waa goobaha ku hareeraysan gaarigaaga oo ay sababaan tiirarka albaabka iyo barkinta madaxa ee xannibaya araggaaga. Baraha aan muuqan sidoo kale waa goobo aysan muraayadahaagu arkeyn.
- Mar kasta oo aad baddesho haadkaaga, bixi tilmaamta saxda ah oo ka eeg geesaha jihada aad u dhaqaaqeyso si aad u xaqiijiso inaadan isku hor dhigin baabuur soo socday. ***Marna ha isku hallayn oo kaliya muraayadahaaga marka aad samaynayso haad baddelasho.***
- Boos ka dhex raadi gaadiidka, tilmaam, oo dabadeed eeg mar kale kahor inta aadan baddelin haadka. Isku diyaari xawaare oo u dhaqaaq haadka kale. Dami tilmaamta leexashada kadib markaad dhameystirto haad baddelashada.

Layn baddelashada waxaa kamid ah:

- Layn baddelashada hal layn ilaa mid kale ee waddada,
- Galitaanka waddo weyn mise waddo dheer oo haad laga soo galo,
- Galitaanka jid kasoo baxa marsha biyeed mise waddada dhinaceeda.

Waa kuwan qaar kamid ah waxyaabaha muhiimka ah ee la sameeyo marka aad eegeyso gaadiidka kaa dambeeya:

Millicso muraayadda haadka iyo muraayadaha haadadka. Xaqiiji in qofna uusan ku tala jirin inuu ku gudbo.

- Eeg garabkaaga bidix mise midig. Eeg halka aad u dhaqaaqeyso. Xaqiiji in dhanka bidix (mise midig) ee geesaha gaarigaaga uu qofna u dhaweyn. Meelahan waxaa loo yaqaan "meelaha aan muuqan" sababtoo ah muraayadahaagu ma arki karaan goobahaas. Waa inaad madaxaaga leexisaa oo aad eegtaa.
- Ka feejignow baaskiillada iyo mootooyinka.
- Dhakhso u eeg. Haka jeedsan waddada kugu soo food leh in ka badan isla markaaba. Gaariga kaa horreeya wuxuu si lama filaan ah u joogsan karaa inta aad gadaal eegeyso.
- Gaari noocuu doonaba aad haysatide, mise sida wanaagsan ee aad u hagaajiso muraayadahaaga, waxa jira meelo aan la arki karin oo weligaa ha isku hallayn kaliya muraayadahaaga. Waa gaariga aadan arag ee ugu khatarta badan.
- Eeg dhammaan haadyada. Qof ku jira haad kale ayaa suurtagal ah inuu qorsheeyo inuu u dhaqaaqo isla goobta aad u dhaqaaqeyso.
- Had iyo jeer tilmaam waxa aad doonayso inaad samayso ugu yaraan 100 cagood kahor intaadan isbaddel samayn.




## Ku wadidda gaari waddada xawaaraha sare

### Galidda Waddo hawlbowle ah oo layman badan leh

Iyadoo ku wadidda gaari waddada xawaaraha sare ay ku lug leedahay xirfadaha aasaasiga ah ee wadista wadada labaad, kororka xawaaraha ayaa ka dhigaya taxadarka xitaa mid aad muhiim u ah. Shilka aadka u daran ayaa kordha marka xawaare sare lagu socdo!

- Xiriir samee adigoo isticmaalaya tilmaamta bidix u leexashada.
- Badanaa wadooyinka xawaaraha sare waxaa lagu gaaraa jidka waddo ku biiridda iyo haadka sheellaraynta. Laynka sheellaraynta, kaas oo kala duwan dherer ahaan, wuxuu awood kuu siinayaa inaad kor u qaaddo xawaaraha gaadiidka ka hor intaadan ku biirida laymanka caadiga ah.
- Boos ka raadso gaadiidka dhexdooda oo bidix kaga biir. Kahor intaadan ku biirin, isticmaal muraayada gadaal qabata ee gaariga oo eeg geesaha si aad u hubiso in jidku firaaqo yahay.
- Dami tilmaamta leexashada mar haddii aad si dhammaystiran u gasho.

Galitaannada qaad ee waddooyinka xawaaraha sare qaarkood ma laha laynka sheellaraynta. Haddii ay sidan dhacdo waa inaad joogsataa kahor intaadan galin, sug inta gaadiidka kala furfurmayo oo

dabadeed xawaaree si aad ugu biirto. Si taxaddar leh u soco maadaama gawaarida mar horeba wadada xawaaraha sare ku socotaa ay aad u dheereeyaan mana aha in ay waddo ku siiyaan. Ha dib dhigin qulqulka gaadiidka adiga oo laynka dhinac ka istaagaya kahor intaadan samaynin xawaare kugu filan.




**Gudbida wadada xawaaraha sare**

Waa inaad had iyo heer ahaataa laynka dhanka midig ilaa aad gudbeyso mooyaane. Ha u gudbin dhinaca midig mise ha dhaafin garabka waddada.

Dhaqaaqa lama filaanka ah ee xawaaraha sare aad bay khatar u tahay. Isticmaal muraayadahaaga oo ka eeg dhinacaaga si aad u hubiso in jidku yahay firaaqo kahor intaadan gudbin. Muraayadaha oo kaliya kuma filna "goobaha aah la arki karin" awgeed. Haddii gaari kaa dambeeya si toos ah ula siman yahay laynka, kama muuqan doono muraayadaha haadka. Had iyo jeer ogeysii gawaarida kale ujeedadaada ah inaad gudubto adigoo isticmaalaya fareejooyinka ku habboon.

Gudubka ammaanka ah waxay ku xirantahay iskaashi u dhexeeya darawallada. Ha xawaarayn marka lagu gudbayo. Si dhakhsi ah u gudub oo ammaan ah sida ugu macquulsan. Ha barbar socon gaari kale in ka badan inta khasabka kugu ah. Isla markiiba hore haka galin marka aad qof gudbeyso. Xaqiiji inaad ka arki karto muraayada gadaal qabata gawaarida la dhaafay oo dhan kahor intaadan ku noqon laynka saxda ah. Ha dhinac socon goobta aan la arki karin ee gaariga kugu xiga.

**Kabixidda Waddo hawlbowle ah oo layman badan leh**

Gal laynka midig ee saxda ah kahor inta aadan gaari kabixidda. Tilmaam ujeedadaada bixidda. Haka gaabin wadada xawaaraha sare, taa badalkeeda, bilow inaad gaabiso isla marka aad gasho laynka hoos u dhigista oo sii wad gaabiska bilowga ku biirida ka bixista. Hoos u dhig xawaaraha la dhajiyay ee ku biirida mise waxaa suurtagal ah inay dhib kugu noqoto inaad ku wareegtid qaloocyada kadis ah. Xaqiiji in tilmaamtaada aad damiso.




**Joogsiga wadada xawaaraha sare**

Marna ha joogsan wadada xawaaraha sare ilaa xaalad degdeg ay tahay mooyaane. Haddii ay dhacdo xaalad degdeg ah, isticmaal calaamadda ku habboon, oo dhig gaariga marsha biyeedka ilaa inta dhinaca laga oggol yahay. Sare u qaad daboolka matoorka si aad u tilmaamto inaad rabto caawin. Wax kasta oo noqoto ma aha inaad waligaa dibu noqoto, lugayso mise istaagto marinka safarka ee wadada xawaaraha sare.

**Feejignaanta Wadada Xawaaraha Sare**

Ku safrida masaafo dheer ee waddooyinka toosan waxa laga yaabaa inaad ku lulmooto mise aadan ka warqabin waxa hareerahaaga ka dhacaya. Tani waa xaalad aad khatar u ah; inaad u kuur gashaa ayaa aad muhiim u ah mar kasta oo gaari wado. Samee dadaal kasta oo aad ku feejigan tahay wadada dheer:

1. Gabooji gaariga gudihiisa.
2. Si joogto ah isha ugu hay wadada kaa horreysa.
3. La sheekeyso qofka ku weheliya mise muusic dhageyso.
4. Kala sooc xawaarahaaga si yar waqti ka waqi.

Calaamada ugu horreysa ee lulada waa inaad ficil sameyso oo ha aadan isku dayin inaad la dagaalanto. Jooji boosteejada kuugu dhow mise goobta adeega oo soco mise iskala bixi, yar seexo, mise haddii ay suurtagal tahay, isbadala. Ha isku hallayn daawooyinka lagu soo jeedo kuwaaso ay u badantahay in ay baabuur wadida ka dhigaan mid aad khatar u ah.

## Gudbid (aan ahayn wadada xawaaraha sare):

**Boos lagu gudbo**

Mar kasta oo aad gaari kale aad ku gudubto waddo laba layn ah waa inaad gashaa laynka ay leeyihiin baabuurta soo socota. Hadaba, waa muhiim inaad ka warqabto gawaarida kale. Tilmaam, oo dabadeed gudub marka wadada firaaqo tahay.

Wadada dheer ee leh xawaaraha 50 ilaa 55 mph, waxaad u baahantahay 10 ilaa 20 il biriqsi si aad u dhameystrito inaad gudubto si ammaan ah.

Waa inaad cabbirtaa inaad leedahay fursad kugu filan oo aad ku gudubto iyo in kale mar kasta oo aad u dhawaato (1) gaari soo socda, (2) buur mise qalooc, (3) isgoys, mise (4) waddo-gooyo.

**Si aad u gudubto:**

- Eeg gaadiid kugu soo socda.
- Ka eeg muraayadahaaga iyo garabkaaga gawaari kusoo raaceysa mise ku gudbeysa.
- Tilmaam.
- Ku leexi gaariga gudbidda laynka (bidix).
- Saxo xawaarahaaga.
- Sug ilaa aad ka aragto muraayada gaariga ku gudbay dhammaantiis.
- Tilmaam oo eeg garabkaaga kahor inta aadan ku noqon laynka midig.
- Ku leexo laynka midig, saxo xawaarahaaga oo dami tilmaamtaada leexashada.

**Marka lagu gudbayo:**

- Joog laynkaaga.
- Ku soco xawaari daggan si aad ugu ogolaato in lagu gudbo.

  Haddii gaariga ku gudbaya uu is beddelo, islamarkaana go'aansado inuu dib u noqdo, waxaa suurtagal ah inaad u baahato inaad xawaareyso kahor inta uusan gaari kugu soo socda iman.



**Marna ha gudbin:**



- Haddii gaari kugu soo socdo. Wadada dheer leedahay xawaare ka sarreeya 800 cagood gudaha 10 ilaa 12 il biriqsi. Sidoo kale gaari kugu soo socdo. Taas macnaheedu waa inaad u baahan tahay in ka badan 1600 cagood mise saddex meelood hal mayl si aad si ammaan ah ugu gudubto (isticmaal odometerkaaga si aad u ogaato waxa masaafadani u eg tahay). Way adagtahay in la cabbiro xawaaraha gawaarida mise mootooyinka soo socda meel u jirta saddex meelood mayl. Uma muuqdaan inay degdeg u imanayaan sida ay dhab ahaan u socdaan. Gaari aad u fog ayaa u muuqda inuu gabi ahaan taaganyahay. Xaqiiqdii, waxaa suurtagal ah inuu aad kuugu dhowyahay si aad u gudubto.
- Haddii aragtidaada ay xannibto qalooc mise buur. Mar kasta oo aragtidaada ay xannibto qalooc mise buur, waa inaad ka fakartaa inuu jiro gaari kugu soo socdo oo aan la arki karin. Hadaba, waa inaad ula dhaqantaa qalooca mise buurta sidii aad samayn lahayd inuu gaari kugu soo socdo oo kale. Tani waxay la mid tahay inaadan bilaabin inaad gudubto haddii aad ku jirto saddex-meelood meel hal mayl buur mise qalooca.
- Goobta isgoysyada. Ha gudbin meesha qof ay u badan tahay inuu galo mise ka gudbo wadada. Gudbitaanku isgoysyada, meelaha wadooyinka laga gudbo, iyo afaafka xarumaha dukaamaysiga waa khatar. Markaad gudbeyso, aragtidaada dadka iyo baabuurta waxaa xanniba gaariga aad gudbeyso.
- Marka aad u dhowdahay isgoyska tareenka mise buundo

***Xaddidaadaha Laynka.*** Kahor intaadan gudbin, hore u sii eeg xaaladaha waddada iyo gaadiidka taasoo sababi karta isticmaalayaasha kale ee wadada inay u gudbaan laynkaaga. Waxa suurtagal ah inaad waydo booskaagii aad ku gudbi lahayd sababtoo ah:

- Dad iyo mootooley u dhow waddada,
- Buundo dhuuban,
- Gabal baraf ah, waddo lugeed raf ah, mise wax kale oo waddada yaalla.

**Boos ku Noqosho.** Haka bixin waddada si aad u gudubto ilaa aad ogtahay inaad boos jugu filan oo aad ku noqoto haysato mooyaane. Ha isku hallayn inaad haysato waqti kugu filan si aad u gudubto gawaari mar kaliya. Hana isku hallayn darawallada kale inay boos aan kusoo noqoto ku siiyaan.

***Astaamaha iyo Calaamadaha.*** Calaamadaha jaallaha ee qeybiya waddada gaadiidka kasoo socda jihada kasoo jeedka. Waddooyin badan ayaa leh calaamadaha laynka taasoo kuu sheegeysa inaadan meel fog arki karin si aad u gudubto.

Xeerka Maine wuxuu rabaa inaad dhammaystirto gudub kahor intaadan gaarin afaafka hore ee goobaha aan la isku gudbin.



*Waa inaadan gudbin halka xariiqa adag ee bartanka ku yaalla ee dhankaaga waddada.*



*Waad gudbin kartaa haddii halka xarriiqa adag ee bartanka ku yaalla ee dhankaaga waddada. Gudub kaliya haddii aanay jirin gawaari kusoo socoto laynkaaga gudubka.*

Calaamadaha laynka iyo astaamaha ayaa kuu sheegi kara marka ay tahay ammaan in la gudbo. Adigoo kaliya ayaa sheegi kari marka ay tahay ammaan in la gudbo.




Waxaa laga yaabaa inaadan gudbin halka astaan jaalle ah oo aan lahayn goobta gudubka ay kaga muuqato dhanka bidix ee wadada mise afar xagal cad (waajib ah) calaamada HA GUDBIN ay kaga muuqato dhanka midig ee waddada.

Markaad gudubto baaskiil wadeyaasha, tartiib u soco oo sii inta aad awooddo. Xeerka Maine wuxuu u baahanyahay inay jirto ugu yaraan saddex cagood oo boos ah oo u dhaxeysa dhanka midig ee gaarigaaga iyo baaskiilka marka aad gudbeyso.

## Xeerarka Basaska dugsiga

Halka ay jiraan basaska dugsiga, waxaa had iyo jeer laga helaa carruur. Carruurtuna waxay u badanyihiin inay sameeyaan wax lamafilaan ah.

**Waa sharci darro in lagu gudbo baska joogsaday dugsiga ee layrka cas ka biglaynayo goobta dhismaha dugsiga, waddo kasta oo weyn mise meelaha baarkinnada oo ku taal Maine.** Haddii aad kaga soo dhowaanayso bas dugsi oo taagan labada jiho, oo nalkiisu casaanka u bigbigleeyihiin, waa inaad gabi ahaanba joojisaa gaarigaaga baska hortiisa mise gadaashiisa ilamarkaana aad sugto inta carruurtu baska ka soo degayaan mise korayaan. Waa inaadan sii wadin ilaa basku dib u bilaabo inuu dhaqaaqo mise ilaa uu darawalka baska dugsigu kusiiyo tilmaam ah inaad dhaqaaqdo. **Xadgudubyada ayaa wata ciqaabyo culus.**




*Waddo Weyn oo u kala Qaybsan Layman Badan*

Waa inaad u joogsataa baska dugsiga ee layrka cas ka biglaynayo  iyo/mise cududa joogsiga soo baxdo. Kadib marka nalalka cas cas ee bigbigleynaya ay joogsadaan oo cududda joogsiga aysan hadda muuqan waxaad u socon kartaa si tartiib ah adigoo iska eegaya carruurta. Haddii waddadu leedahay kala qaybiye adag oo u dhexeeya adiga iyo baska, maaha inaad joogsato.




## Baarkimid

Waa inaad xaqiijisaa in gaarigaagu khatar ahayn marka aad baarkinto.  Marka gaarigaaga aad ku baarkinto wado dadweyne, hubi inaadan hor dhigin gaadiidka. Waa inaad barbar dhigtaa waddada marka laga reebo halka xarriiqyada xagal baarkimida lagu rinjiyeeyay waddada. Ka tag ugu yaraan laba cagood oo bannaan inta u dhaxaysa gaarigaaga iyo gawaarida lagu baarkimay hore mise gadaal.

- Mar kasta ku baarkim goobta calaamadeysan ee baarkinnada.
- Ka fogow laymanka wadista inta suurtagalka ah. Haddii ay jirto wado garab ah, gal inta aad awoodo ee suurtagalka ah. Haddii ay jirto jid kasoo baxa marsha biyeedka, ku baarkim inta ugu dhow ee aad awooddo (oo aan ka badnayn 18 inji wax ka fog)

- Xaqiiji in gaarigaagu dhaqaaqin. Hagaaji bareega baarkinka islamarkaana u badal marshada baarkin (ugu horrayn mise gadaal ee gaariga marshada ah).
- Haddii aad ku baarkimtay buur: Leexi taayarrada si haddii gaarigu hoos u socdo dhinacyada joojiyaan. Mise, haddii aysan jirin wax xayndaab ah, shaaggaga ayaa gaariga ka leexin doona waddada (ma aha taraafikada). U leexi taayarrada dhinaca midig marka aad ku baarkimeyso meel hoose mise sare oo aan lahayn wado kasoo baxda marsha biyeed. U leexi taayarrada dhinaca bidix marka aad ku baarkimeyso meel leh wado kasoo baxda marsha biyeed.
- Ka fogow gaadiidka. Ka bax gaarigaaga dhinaca wadada marsha biyeedka haddii aad awooddo. Haddii ay qasan tahay inaad isticmaasho dhinaca wadada, hubi gaadiidka kaa dambeeya, gaar ahaan baaskiillada, kahor inta aadan furin albaabka.
- Badbaadi gaarigaaga. Dami matoorka oo ka saar furaha marka aad gaariga ka tageyso. Haddii gaariga uusan kuu muuqan waxay xikmaddu tahay inaad xirto.

**Sharciyada dawlada hoose qaarkood kuuma ogola inaad gaari ku baarkimato:**

- Goob loogu talagalay dadka naafada ah ilaa aad haysato ogolaanshaha baarkinka gaarka ah mise taarikada iyo boorarka naafada ($100 Ganaax). Ku darso oo, sharciga gobolku wuxuu mamnuucayaa isticmaalka taargada naafada iyo boorarka ($100 Ganaax).
- Goobta rarka.
- 10 cagood in u jirta qalabka biyaha dab-demiska.
- 15 cagood in u jirta albaabka laga galo xarunta dab-damiska mise toos ugu beeggan albaabka laga soo galo.
- 15 cagood in u jirta gudubfarowga.
- Albaabka laga soo galo dugsi, kaniisad, tiyaatar, albeerko, cusbitaal, mise goob dadweyne inta lagu jiro saacadaha loo qoondeeyay.

**Goorma ayaa la aqbali karaa in lagu baarkimto barta loogu tala galay naafada oo leh marin?**

Qofka ku baarkimta meel baarkinka naafada ah, oo leh marin laga galo, ayaa isticmaali doona marinka si uu u galo mise uga baxo gaariga. Waa in la tusaa boorka mise tabeellaha naafada.

- Waxaa la isticmaalaa marka adeegsiga marinka loo baahdo si loo galo mise looga baxo gaariga marka la isticmaalayo wiishka jaranjarada mise aaladaha kale ee lagu socdo.



**<u>Isticmaal Marinka</u>**
<u>Baarkinka</u> isticmaalka marin la mamnuucay.

**Si xun u isticmaalka marinka gelitaanka waxaa loo qaataa xadgudub taraafikada waxaana lagu mutaysanayaa ganaax aan ka yarayn $200.00.**

Wixii macluumaad intaa dheer oo kusaabsan soo saarista taagada naafada iyo boorka baarkinka ee Gobolka Maine, fadlan kala xiriir Xafiiska Gawaarida (207) 624-9000, kordhinta 52149.



**Malaha Goob Baarkin -** Ka eeg calaamadaha mise cirifyada rinjiga leh ee mamnuuci kara mise xaddidaya baarkinka. Qaar kamid ah meelaha gawaarida lagu baarkimto ma laha cirif calaamado midab leh.

**Baarkinka Qotonson Iyo Xagal Baarkimida**

- Marka la galayo:
  - Raadso boos baarkin oo iska eeg gaadiidka.
  - Tilmaam.
  - Dhexda ka gali gaarigaaga booska baarkinka.
  - U dhaqaaq qeybta hore ee booska oo joogso.
- Maka laga baxayo:
  - Iska eeg gaadiid.
  - Sii wad si aad u hubiso gaadiidka oo dib ugu celi ilaa turuska hore uu ka dhamaado gaariga ku ag yaal.
  - Si fiican ugu leexi isteerinka jihada aad rabto in gadaasha gaarigu u dhaqaaqo.
  - Marka gaarigaaga faaruqo booska baarkinka joogso. U dhaqaaq inaad kaxeyso oo aad hore aaddo.




**Xagal baarkimid**




**Baarkin qotonsan**

**Baakinka Siman/Baarkin Taxan**

Marka la galayo:

- Raadso baarking bannaan. Iska eeg gaadiidka oo tilmaam.
- Dhig adigoo la simaya gaariga aad ku daba baakimi doonto. La sim gaarigaas balse in u jirta 2 cagood.
- Marka taraafiga firaaqo yahay, u wareeg gadaal oo iska eeg muraayada.



1 2 3 4

- Si qumaati ah u leexi taayarada, eeg garabkaaga oo tartiib gadaal ugu soco adigoo ku wajahan gaariga kaa dambeeya.
- Sii wad dib u bixida ilaa albaabkaaga hore uu gudbo fuqa gaariga kugu fool leh, si dhakhsi ah u toosi taayarada oo si toos ah gadaal ugu sii soco.
- Markaad ka faaruqda gaariga, bidix u leexi taayarada oo si tartiib ah ugu laabo gaariga kaa dambeeya.
- Jooji intaadan taaban fuqa gaariga kaa dambeeya.
- Si qumaati ah u leexi taayarada oo booxka dhexe ee baarkinka gal.
- Toosi taayarada inaad buur saarantahay mooyaane. Waa inaad cirifka u jirtaa 6 inji balse aadan u jirin wax ka badan 18 inji marka aad baarkimayso.
- Laqabsiga habkan, iyadoo loo eegayo cabbirka taayarada gaariga ayaa suurta gal ah balse ku celceliska ayaa mar walba muhiim ah.

Marka laga baxaso booska baarkin badalashada mise baarkinka is dhinac yaalla:

- Iska eeg gaadiidka oo isticmaal bareega. U diyaar ahaw gadaal inaad u dhaqaaqdo oo u dhawaato gaariga gadaashaada ku baakiman.
- Iska eeg gaadiidka oo tilmaam.  U diyaar garow inaad hore u kaxeyso si tartiib ah. Gal waddada.
- Xaqiiji in fuqa gaarigaaga uu faaruqo gaariga ka horreeya. Haddii aysan ahayn sidaas, dib u noqo oo hagaaji.
- Dhakhsi ugu dhaqaaq laynka taraafikada marka barta albaabka gaarigaaga ka faaruqo fuqa dambe ee gaariga hortaada ah.

**Gaari kicinta Goobta Baarkinka**

Haddii laagu baarkimo dhinaca midig ee waddada, kadib markaad kiciso gaarigaaga, ka eeg garabkaaga bidix (ma ahan muraayadda danbe oo kaliya). Marka uu jidku faaruq yahay sii tilmaamta ku habboon oo si tartiib ah ugu soo bax waddada oo u gal laynka saxda ah sida ugu dhakhsaha badan. Isla sidaas oo kale ka samee cirifyada bidixda, marka laga reebo in aad eegto garabkaaga midig marka aad gelayso waddo.

Iyadoo aan loo eegin nooca waddada mise booska, had iyo jeer xaqiiqso in laynkaka aad gelayso uu yahay mid ka madax banaan taraafikada masaafo ammaan leh.

## Dib u leexasho

**Ku kala fireynta labada dhaqdhaqaaq** – Waddo, luuq mise waddo mareen ayaa loo isticmaali karaa in lagu kala fireeyo marka aadan ku wadi karin afaafka xaafada.



- ***K*u kala fireynta** ***Labada Dhaqdhaqaaq*** – Xaqiiji aysan gawaari kaa dambeyn. Tilmaam midig leexasho. Ku wad dhererka hal gaari waddada mise luuqa, saar gacantaaga midig kursiga rakaabka, eeg garabkaaga midig gadaashiisa oo dib ugu noqo waddada. U diyaar garow inaad ku kaxeyso oo iska eeg gaadiid. Markay firaaqo tahay, tilmaam bixix, kadibna u leexo bidix laynka saxda ah islamarkaana toos u kaxee.



- ***Hor u socoshada labada dhaqdhaqaaq leh*** – Iska xaqiiji in aanu jirin wax gaadiid kugu soo socda oo tilmaam bidix u leexasho. U dhawow bartanka waddada khaaska ah oo u leexo waddada khaaska ah mise luuqa. U leexo sida ugu macquulsan dhanka midig ee darawalka. Joogso marka gadaasha baabuurka ka faaruqayo cirifka qarkiisa mise cirifka waddada khaaska ah. Iska xaqiiji gaadiidka, tilmaam midig leexasho oo u wareeg si aad u leexiso. Marka ay dariiqa firaaqo yahay, dib u soo celi markaad isteerinka si degdeg ah u jeedinayso ilaa dhanka midig. Toosi taayaradaada oo joogso markaad laynka bartanka kaga jirto. U wareeg si aad u kaxeyso, dami tilmaamta, oo hore u soco.

**Ku kala firaynta Saddexda Calaamad** – isticmaal tan kaliya haddii waddada ay aad u dhuubantahay si loo soo kala fireeyo. Way fiicantahay in aad ku wareegsato baloogga haddii aad awooddo. Tani waa in kaliya loo isticmaalaa layn leh laba waddo.

- Eeg muraayadahaaga oo tilmaam midig leexasho. Joogso dhanka midig ee waddada.

- Daar tilmaamta bidix leexashada, eeg gaadiidka adigoo ka eegaya garabkaaga bidix. Marka gaadiidka faaruqo, bidix u wada jar, u kaxee dhanka kale ee waddada, oo markaa jooji.

- U wareeg inaad dib soo socoto. Iska eeg gaadiid oo xaqiiji goobaha aan muuqan labada dhinacba. Marka gaadiidka faaruqo, midig u wada jar, u kaxee dhanka kale ee waddada, oo markaa jooji.

- U wareeg inaad u kaxeyso oo u leexo tilmaamta bidixda. Iska eeg gaadiid iyo goobaha aan muuqan. Marka taraafiga faaruq yahay, bidix u wada jar oo hore kusii kaxee laynka midig ee u socda jihada cusub. Iska eeg markale taraafig oo dami tilmaamtaada leexashada.



## Ssu'aalaha Muraajacada ee Qaybta 7:

1. Sidee u sii wadeysaa markaad u dhowaanayso goobada taraafiga?
2. Waa maxay hababka ay tahay inaad raacdo kahor intaadan isku dayin inaad ka gudubto gaari kale?
3. Si aad si ammaan ah ugu beddelato layn markaad gaari wadid, habraac noocee ayaa ah inaad raacdo?
4. Halkee ayay khatar ku tahay in la gudbo?
5. Sidee u go'aamin kartaa in uu jiro iyo in kale boos ku filan oo looga gudbo gaari hortaada socda?
6. Run mise Khalad? Markaad isku dayayso inaad gudubto gaari kale waa inaad had iyo jeer ula dhaqantaa buur mise qalooca baabuur soo socda?
7. Xaage bay had iyio heer ku taal "goobta aan muuqan" ee darawalka?
8. Run mise Khalad? Markaad wadooyin toosan ku waddo masaafo dheer waa inaad gaarigaaga u ilaalisaa sida ugu macquulsan.
9. Waa maxay habraacyada ay tahay inaad raacdo marka aad gelayso wadada xawaaraha sare?

QAYBTA 8

# Maaraynta Wakhtiga iyo Masaafada

Wadista waxay u baahantahay xirfado aad ku kasban karto adigoo sameynaya ku celcelin. Cutubkani waxay daboolaysaa xirfadaha muhiimka ah ee gaari wadid nabdoon.

## Arkidda Waxa Muhiimka ah

Markaad kaxeyneeso gaari waa inaad had iyo jeer ka war qabtaa agagaarkaaga. Waa in aad ka warqabto waxa kaa horeeya, dhinacyada iyo gadaal. Hayso raadin is daba socod ah si aad u isticmaasho mar kasta oo aad gaari wadid.

Raadinta joogtada ah waxay kaa caawinaysaa inaad durba aragto khataraha. Waxay ku siinaysaa wakhti aad ku beddesho xawaaraha mise jihada si aad uga fogaato khataraha. Feejignow, ha eegin, oo indhahaaga ha ahaadaan kuwo dhaqdhaqaaqa markaad raadinayso carqaladaha suurtagalka ah. Inta badan waxaad samayso markaad gaari wadid waa falcelin waxaad aragto.

### Lahaanshaha Daaqado iyo Muraayado Nadiif ah

Cutubyadii hore ayaa kuu sheegay halka la fiiriyo. Cutubkani wuxuu kuu sheegayaa sida loo yeesho aragti cad meel kasta oo aad eegto.

Sharci ahaan, iyo badbaadada awgeed, waa inaad si fiican wax uga arki kartaa dhammaan daaqadaha, muraayadaha hore, iyo dhammaan muraayadaha. Si aad si cad wax ugu arago waa inaad:

- Nadiifi muraayadda hore. Iftiinka qorraxda mise nalka hore ee muraayadda hore oo wasakhaysan ayaa ka dhigaysa mid adag in la arko. Qaado maro si aad u joogsato oo aad u nadiifiso muraayadaha hore marka loo baahdo.
- Buuxso biyaha muraayada dhaqa. Hase yeeshee, ha isticmaalin dareeraha wax lagu dhaqo maalin aad u qabow sababtoo ah isku darkaas ayaaa suurtagal ah inuu qaboojiyo muraayadda hore.
- Sigaar cabista marka gaari la wado waxay muraayadaha ku keentaa hummaag gaariga gudihiisa. Si joogta ah u nadiifi gudaha daaqadaha haddii aad sigaar cabto.
- Barafka cad, baraf, mise dhaxanta ka nadiifi dhammaan daaqadaha iyo nalalka dambe kahor intaadan bilaabin inaad gaari wado.
- Wax haka soo laadlaadin muraayada mise ha ku dhajin sharraxaad muraayada hore. Wax kasta oo gaariga ku jira oo xannibaya aragga darawalka waa xadgudub sharci.

### Xirashada Muraayado

Haddii aad xirantahay muraayado mise muraayadaha indhaha ku dhex jira:

- Haddii la xaddido, waa inaad had iyo jeer xiratаa markaad gaari wadid.
- Dhigo muraayado dheeraad ah gaariga gudihiisa haddii ay dhacdo in muraayadahaaga caadiga ah ay jabaan mise lumaan.

Si aad u noqoto darawal wanaagsan, waa inaad si fiican wax u aragtaa. Si fiican u araga micneheedu waa:

**Hortaada eeg** – Inaad meel fog wax ka eegto waxay ku siinaysaa wakhti aad ku qorsheysato jidkaaga. Sida ugu dhakhsaha badan ee aad u aragto dhibaato, ayey u badan tahay waqtiga falcelinta aad leedahay.




Inta aad eegid wadada ayey kuxirantahay meesha aad u wadid. Magaalooyinka iyo meelaha magaalooyinka, waxaa suurtagal ah inaadan awoodin inaad hore u aragto sida wadada dheer. Si dhow ha raacin gawaaarida waaweyn maxaa yeelay waxay xannibi doonaan aragtidaada. Sii naftaada boos si aad wax u aragto.

Ka soo qaad inaad tahay darawalka oo eegaya muraayadda hore. Waxaad ku wajahantahay dhamaadka laynka. Haddii aadan si dhakhsi ah u bedelin laynka, waxaa suurtagal ah inaad si kadis ah u beddesho layn, mise joogsato oo aad sugto inta gaadiidku ka dhamaanayo.

Si aad uga fogaato go'aannada daqiiqadaha ugu dambeeya, waxaad u baahan tahay inaad meel fog wax ka eegto si aad hore wax u aragto. Mid kamid ah khaladaadka ugu badan ee darawaladu sameeyaan waa in ay eegaan gaariga hortooda ah halkii ay ka eegi lahaayeen wadada. Darawalka khabiirka ah wuxuu isku dayaa inuu sii eego 20 ilaa 30 ilbiriqsi kahor.

Eegista 20 ilaa 30 ilbiriqsi kahor waxay sidoo kale kaa caawineysaa inaad si kale u maamusho gaariga. Marka aad digniinta hore diirada saarto, way kuu fududaanaysaa inaad gaarigaaga ku hayso wado joogto ah.

**Eeg dhinacyada**

Eegista 20 ilaa 30 ilbiriqsi kahor macnaheedu maaha inaad eegto bartamaha wadada. Waxay ka macno tahay eegista goobta oo dhan oo ay ku jiraan dhinacyada wadada sidoo kale. Indha indhaynta waddada dhinaceeda waxay kaa caawinaysaa inaad aragto:

- Gawaariida iyo dadka laga yaabo in ay waddada ku jiraan marka aad gaarto.
- Waxay astaan u tahay xaalad soo wajahan.
- Astaamaha ku siinaya macluumaadka kusaabsan meelaha kaa horreeya iyo sida loo gaaro.
- Xayawaannada. Gawaari badan ayaa ku dhaca deerada, gaar ahaan bilaha Oktoobar iyo Noofambar. Haddii aad aragto deero, hoonka u dhawaaji, oo raadi deerada kale ee daba joogta.

Haddii aad hore sii eegto, waxaad arki doontaa waxyaabo muhiim ah oo laga yaabo inaadan arkin hadhow, sida qof joraya gaari baarkin kujra. Albaabka gaariga ayaa suurtagal ah inuu mar kale furmo, mise gaariga ayaa laga yaabaa inuu si lama filaan ah u soo galo laynkaaga.

**Goobaha Waddada Dhinaceeda**

Mar kasta oo dhaq dhaqaaq badan uu ka jiro wadada dhinaceeda, waxaa jirta fursad wanaagsan in qof uu gooyo waddada mise soo galo. Hadaba, aad bay muhiim u tahay inaad eegto dhinacyada markaad u dhowdahay:

- Xarumaha dukaameysiga iyo goobaha baarkimada,
- Goobaha dhismayaasha,
- Marsha biyeedyada lagu badanyahay,
- Goobaha ciyaarta, deyrka dugsiyada, iyo baarkimada,
- Cawska iyo iibka garaashyada.



Gudbidda Dugsiga

Calaamadda 5-geesoodka ayaamacnaheedu yahay inaad ku sugan tahay aag dugsi oo ay tahay inay hoos u dhigto xawaarahaaga 15 mph inta lagu jiro bareega, mise marka carruurtu aadayaan mise ka baxayaan dugsiga, inta lagu jiro furitaanka dugsiga mise saacadaha xiritaanka (½ saac kahor bilowga maalinta dugsiga ilaa ½ saac kadib dhammaadka maalinta dugsiga), mise marka tilmaamaha xaddiga xawaaraha dugsiga ay bigbigleynayaan inta lagu jiro furitaanka dugsiga mise saacadaha xiritaanka.

**Isgoysyada Tareenada**

Eeg labada dhinac markaad u soo dhowaanayso isgoyska tareenka.

- Ka feejignow basaska, basaska dugsiga, booyadaha taangiyada, iwm taasoo ay tahay inay istaagaan dhammaan isgoysyada tareenada.
- Haddii ay tahay inaad ku istaagto taraafiko badan, istaag intaadan gaaran biraha waddada tareenka - ha dul joogsan.
- Tartiib u soco oo eeg labada dhinac, xitaa haddii calaamadda digniintu aysan bigbigleeneyn maadaama ay suurtagal tahay inaysan shaqeyneynin.
- Haddii nalalka casaanka ahi ay bigbigleeyaan, joogso ugu yaraan 15 cagood isgoyska oo sug ilaa inta ay ka baxayaan ama ilaa aad aragto in jidku cad yahay labada dhinac. Ha ku wadin dhinac kasta oo kamid ah albaabka laga gudbo ee tareenada mise jid gooyo.
- Haddii lagugu istaajiyo isgoys tareen halkaas oo ay jiraan wax kabadan hal waddo, ha dhaqaaqin isla marka uu tareen gudbo. Sug ilaa aad ka arkeyso muuqaal cad oo ka hooseeya jidka labada jiho kahor intaadan bilaabin inaad gudubto. Tareen kale ayaa suurtagal ah inuu kasoo socdo jiho kale.
- Ha noqon mid marshada galiya marka uu ka gudbayso jidka tareenka. Marshada inay kuugu sii jirto ayaa ku siinaysa koontarool wanaagsan oogada aan sinnayn.

  Jidka ku calaamadeysan "Exempt" lama isticmaalo badanaa balse waa la isticmaali karaa. Eeg dhammaan jidadka adigoon u eegin calaamadaha.

**Eeg Gadaal** – Waa inaad ka war qabtaa gaadiidka kaa dambeeya. Eeg gadaashaada marka aad beddesho laynka, adigoo gaabinaya, mise joogsanaya. Eeg kahor intaadan galin isgoyska.  Badanaa ka eeg gaadiidka kaa dambeeya muraayadaada - 6 ilaa 7 ilbirisi kasta. Qaabkan ayaad ku ogaanaysaa haddii qof si aad u dhow ku daba socdo mise uu si degdeg ah kuugu soo socdo taa oo ku siinaysa wakhti aad ku beddesho xawaarahaaga mise jidkaaga haddii ay daruuri tahay. Intaa ku darso oo, waxaad ogaaneysaa booska masaafada dambe ee aad heysato mar kasta.

Waxaad u baahantahay inaad gadaal ka eegto mar kasta oo aad si degdeg ah u gaabinayso, dib u dhigto, mise aad ku wado buur dheer mise dagaandag ah.

**Marka aad si Lama filaan ah u Gaabiso**

Si degdeg ah u fiiri muraayadaha kahor inta aadan hoos u dhigin mise joojin. Aad bay muhiim u tahay in tan la sameeyo

markaad si lama filaan ah u gaabinayso.

Waa kuwan xaaladaha qaarkood marka aad u baahantahay inaad gadaal eegto kahor intaadan gaabin:

- Markaad ka gaabiso wax waddada ka horraysa oo darawalka ka dambeeya aadan arki karin (tusaale, waxaad ka soo wareegtaa meel gees ah oo aad arkayso gaariga waddada dhex yaalla).
- Markaad isu diyaarinayso inaad u leexato waddo dhinaceeda mise waddokhaas ah. (Marka ay leexashadu ka horreyso isgoys weyn, darawalka ka dambeeya ma filayo inaad ka gaabinayso meesha aad sameyso waxaana laga yaabaa inuu aad kuugu dhow yahay)
- Markaad joogsanayso inaad gasho meel baarkin ah.
- Markaad u gaabinayso mise u joojinayso dadka lugaynaya.

**U Oggolaanshaha Boos Meel bannaan Darawallada Dhibaataysan**

Waxaa jira dad gaar ah oo ay tahay inaad siiso boos badan markaad gaari wadid. Haddii aad feejigantahay waxaad baran doontaa inaad ogaato iyaga markaad gaari wadato.



***Darawallada aan ku arki karin.***

Qof aan ku arki karin waxaa laga yaabaa inuu jidkaaga galo isagoon ogeyn inaad adiga ku jirto. Dadka dhibka ku qaba inay ku arkaan waxaa ka mid ah:

- Darawallada isgoysyada, mise waddooyinka, kuwaasoo aragtidooda ay xannibeen dhismayaal, geedo, mise gawaari kale.
- Darawalada dib uga baxaya wadooyinka mise goobaha baarkimada.
- Darawallada daaqadahooda barafka dabooleen.



***Dadka mashquula.*** Xitaa marka ay kuwa kale ku arkaan, u ogolow boos dheeri ah haddii aad moodo inay mashquuli karaan. Dadka mashquula waxaa kamid ah:

Ragga iyo Haweenka alaabada geeya.
Shaqaalaha dhismaha.
Carruurta badanaa kusoo carara wadada iyagoo aan iska eegin.

***Dadka suurtagalka ah inay jahwareeraan.*** Qofka jahwareersan waxay u badantahay inuu dhaqaaqo isagoon eegin. Dadka jahwareersan waxaa kamid ah:

- Dalxiisayaal, inta badan waxay joogaan isgoysyo adag.




*Dalxiisahan waxaa suurtagal ah inuu ku jahawareeriyo calaamadda oo laga yaabo inuu si lama filaan ah u beddelo laynka. U diyaar garow inaad ka falceliso.*

**Darawallada u gaabiya sababta muuqata oo aan la garanayn.**



*Darawalku waxa uu soo galay laynka ka bixidda kadibna si lama filaan ah ayuu bareeg u qabtay. Ka digtoonow maxaa yeelay gaarigu dib ayuu uga bixi karaa laynkiisa.*

***Darawallada dhibka gala.*** Haddii darawallada kale ay khalad sameeyaan, samee wixii aad awooddo si aad iyaga u caawiso. Darawallada raba caawinta waxaa kamid ah:

- Darawalada mara marka aad u soo dhawaato qalooca mise gaari soo socda. Dhin xawaaraha oo u ogolow inay laynka kusoo noqdaan.
- Darawallada laga yaabo in gaari ku soo khasbay laynkaaga, wado lugeeye, baskiil-wade, jidgooyo mise waddo dhuuban ku khasabto inay soo galaan laynkaaga. Gaabi oo dhanka midig u dhaqaaq ilaa inta aad awooddo.

## Maaraynta Xawaaraha

Si ammaan ah in gaari loo wado waxay u baahantahay in xawaarahaaga lagu hagaajiyo xaaladaha waddooyinka iyo gaadiidka, ilaalinta masaafada fogaanshaha, iyo adeecidda xadka xawaaraha**.** Waa maxay xawaare ammaan ah? Degdeg sidee ah baad aad degdeg u ah? Dhammaan waxay salka ku heysaa xaaladaha.

### Marka aad Fuuleyso Meel Sarreysa mise Dagaandag Buur

Eeg muraayadahaaga. Darawallada gawaarida xamuulka qaada iyo basaska ayaa inta badan isku daya in ay xawaarahooda kordhiyaan si ay u gaaraan meesha sare ee buurta xigta. Haddii aad goor hore aragto, waad badalan kartaa laynka.

**Isku diyaarinta Xaaladaha Waddada**




**Xoodooyin/qalloooc** – Had iyo jeer gaabis ku soco kahor intaadan gelin qalooca. Xawaaraha ammaanka ah wuxuu kuu ogolaanayaa inaad xoogaa sheellareyso intaad kujirtid xagga qalooca. Aad usii gaabi haddii jiididdu ay liidato, markaad daba socoto gawaarida kale mise haddii aadan arki karin dhammaadka qalooca. Bareeg-qabashada adag ee qalooca waxay sababi kartaa simbiririxasho sababtoo ah ilaa laba tan oo baabuur ayaa ku socda xariiq toosan oo leh taayarada hore oo kaliya si loo xakameeyo leexashada. Haddii qalooca aad u fiiqan yahay, mise haddii aad si degdeg ah u socoto, taayarada ayaa lumin kara qabatiinkooda oo waxay keeni karaan simbirirxasho. Qaloocyada xun waxaa badanaa lagu dhejiyaa calaamado leh naqshad dhayman leh midab jaalle.

**Qalooc fiiqan oo dhanka bidix ah.**



**Qalooc midig**



**Wadooyin Sibiibix ah** – Ku yaree xawaaraha goobta calaamadda ugu horreysa ee roobka, barafka, quruuraxa barafka, mise barafka. Marka waddadu simbiririxo tahay, waxay qaadan doontaa wakhti dheer in la joogsado, wayna adkaan doontaa in la leexiyo iyada oo aan la boodboodin. Haddi waddada kaa horeeyaa ay tahay mid simbiririxsho leh, ma siinayso xejinta taayarkaagu u baahanyahay si uu u ilaaliyo kontoroolka marka wadada liidata waa in aad u wadaa gaariga tartiib inta aad ku socoto wado qalalan.
Waa kuwan qaar kamid ah tilmaamo kusaabsan inta gaariga la dhimi karo:

- Waddo qoyan: 5 ilaa 10 cagood qabooji xawaaraha gaariga.
- Baraf uruursan: Xawaaaraha barkiis qabooji.
- Baraf: U qabooji sidii gurguurasho.

Barafka soo dhacaya mise qulqulaya, caleemaha qoyan, mise quruuruxda waddada ayaa laga yaabaa inay ka dhigaan mid simbiririxo leh. Waddooyinka qaar ayaa aad uga simbiririxo badan kuwa kale marka ay qoyanyihiin.

Wadooyinkan waxaa badanaa lagu dhejiyaa calaamado digniin ah:



Waad ogtahay inay muhiim tahay in la gaabiyo marka waddadu ay simbiririxo leedahay. Balse waa inaad ka taxadartaa marka ay soo baxaan xaalado simbiririxasho sida:

- Marka roob da'o, laamiga wuxuu noqon karaa mid aad u silicsan dhowrka daqiiqo ee ugu horreeya. Kulaylku wuxuu keenaa saliid ku jirta asphalt inay soo baxdo oogada sare. Sidoo kale, waxaa laga yaabaa in saliidda ay ku soo dhacday oogada waddada taasoo ka timid gaari kale. Roobku wuxuu ka dhigaa wadada mid leh simbiririxasho ilaa saliidda la dhaqo.

- Maalmaha qabowga, qoyaanka, buundooyinka iyo dusha sare ee la isku gudbo waxay qarin karaan goobaha barafka. Ka warqab in buundooyinka iyo dusha sare ee la isku gudbo ay marka hore barafoobaan dabadeedna engegaan ugu dambayn.
- Marka heerkulku ku dhawaado baraf, barafka jidku waa qoyan yahay (burcad) sidaas awgeed aad bay u simbiririxo leedahay marka loo eego heerkulka qabow.



**Biyo finiin** – Xawaaraha hooseeya, taayarada ayaa inta badan biyaha ka masaxa oogada waddada. Waxay la mid tahay sida muraayad masaxa uga masaxo biyaha daaqadda. Markaad dhakhsi u socoto, taayaradaadu sidoo kale ma masixi karaan wadada. Waxay bilaabaan inay fuulaan biyo hummaag ah, sida barafka biyaha. Tani waxaa lagu magacaabaa "biyo finiin." Roobabka culus, taayarada waxay lumin karaan dhammaan xiriirka waddada oo xawaare sare leh. Taayarada duugga noqda waxay lumiyaan xiriirka xawaaraha aadka u hooseeya. Xaaladda sidaas oo kale ah, isbeddel yar oo jihada ah mise dabayl ayaa ku tuuri karta gaarigaaga meel simbirirxasho leh. Sida ugu wanaagsan ee aad uga ilaalin karto finiinka waa in aad hubiso in taayaradaadu ay wanaagsan yihiin iyo in aad hoos u dhigto xawaarahaaga marka waddadu qoyan tahay.




***Waddooyinka Daadka leh –*** Ha ku dhex wadin meelo waaweyn oo biyo taagan. Haddii waddadu daad leedahay, raadso waddo kale.

## Masaafada Joogsiga

Wadarta masaafada joogsiga waa fogaanta wakhtiga aad xaqiiqsatay inay tahay inaad joogsato ilaa gaarigaaga gabi ahaanba joogsado. Masaafada joogsiga waxaa saameeya dhowr waxyaabood:

- Xawaaraha – sida ugu degdegta badan ee aad ku socoto, ayaa wakhti iyo masaafo badani qaadataa in la joogsado.
- Waqtiga aragtida – wakhtiga ay kugu qaadato inaad garawsato inaad joogsato. Celceliska wakhtiga aragtida darawalka ee feejignaanta waa ¾ ilaa 1 ilbiriqsi.
- Wakhtiga falcelintaada – wakhtiga ay kugu qaadanayso in aad ka falceliso oo aad cagtaada ka soo qaaddo sheellaraha una guurto birta bareega oo aad billowdo inaad bareega qabato. Celceliska darawalka waxa uu leeyahay wakhtiga falcelinta ee ¾ ilaa 1 ilbiriqsi.
- Masaafada bareeg-qabashada – fogaanta ay qaadanayso si loo joojiyo gaarigaaga. 50 mayl saacadii oo ah laami qalalan oo leh bareeg fiican, waxay qaadan kartaa ilaa 158 cagood. Ku darida wakhtiga aragtida iyo wakhtiga falcelinta waxay ku dhowdahay labanlaab masaafadan.

## Xaddidka Xawaaraha

Xaddidka xawaaraha ayaa lagu dhejiyay wadooyin badan. Xaddidka waxay ku salaysan yihiin xaaladda

wadada, inta aad arki karto, iyo sida gaadiidka caadiga ah yihiin. Xawaaraha la dhejiyay kuuma sheegi karaan xawaaraha ay tahay inaad ku wado. Waxa kaliya oo ay sheegaan inaadan ku socon karin wax kabadan xawaaraha la tusay. Haddii waddada iyo xaaladaha cimiladu ay xawaaraha qoran ka dhigaan mid aan ammaan ahayn, waa inaad hoos u dhigtaa.

Xawaaraha ugu badan ee Maine, haddii aan si kale loo dhejin, waa:

- 45 mayl saacaddiiba meelaha ka baxsan meherad kasta mise deegaan mise dhisme Maine ah.
- 25 mayl saacaddii goob ganacsi, degmo la dego, mise goob dhisme gobolka ah.
- 15 mayl saacaddii marka aad ka gudubto dugsiga xilliga bareega, mise marka carruurtu aadayaan mise ka imanayaan dugsiga inta lagu jiro saacadaha furitaanka ama xiritaanka dugsiga. Way adag tahay in la ogaado marka ay xilliyada sidaas yihiin goorta shaki jiro, isticmaal taxadar xad dhaaf ah.

Ganaax laba jeer ka badan midka caadiga ah ayaa lagu soo rogayaa haddii laga badiyo xadka xawaaraha la dhejiyay ee aagga dugsiga.

Khubarada taraafikada ayaa daraasad ku sameeyay xaaladaha waddooyinka, gaadiidka, iyo shilalka ka dhaca wadada si ay go'aan uga gaaraan xaddiga xawaaraha macquulka ah. Waa sharci darro in laga badiyo xadidka xawaaraha la dhejiyay. In lagu tartamo waddada dheer islamarkaana si qayru masuulnimo ah loo wado lama ogola. Sharciga Maine wuxuu kaloo leeyahay waa inaadan si tartiib tartiib ah u wadin si aad u farageliso dhaqdhaqaaqa caadiga ah ee macquulka ah ee gaadiidka marka laga reebo meelaha xawaaraha la dhimay ay lagama maarmaan u tahay badbaadada. Qaar kamid ah waddooyinka dhaadheer ayaa laga yaabaa inay leeyihiin xaddidka ugu yar ee la dhejiyay.

**Waa sidee Dusha Waddada?**

Meesha kaliya ee gaarigaagu iyo waddada ay iska taaban karaan waa taayarada. Iyo, wakhti kasta, afarta taayar ee wadajira waxay leeyihiin hal cag oo laba jibbaaran oo cinjir ah oo ka korreysadusha waddada. Intee in le'eg oo la qabsado tan laba jibbaaran ayay ku xiran tahay xaaladda waddada iyo taayarada. Qaar badan oo kamid ah darawallada cusub ayaan u fiirsan xaaladaha waddooyinka. Taasi waa sababta darawalkada cusub ay u leeyihiin shilal badan oo "fara kabax ah" marka loo eego darawalada khibradda leh. (Sidoo kale hubi raadka shaaggaga. Beddel shaaggaha kahor inta aanay aad uga duugoobin in lagu badbaado.)

**Intee in le'eg ayaa si wanaagsan wax Arki Kartaa?**

Haddii ay wax yaallaan waddadaada, waxaad u baahantahay inaad ku aragto wakhtiga loogu tala galay si aad u awooddo inaad joojiso. Haddii aad mooddo in aad leedahay shaag wanaagsan, bareeg fiican, iyo xaalado laami qalalan shaxda soo socotaa waa inay kaa caawiso in la go'aamiyo inta ka horeysa ee aad arki karto inaad u wadid gaariga si badqab leh markaad ku socoto xawaare cayiman.

| JOOGSIGA MASAAFADA XAWAARAHA KALA DUWAN<br><br>Laamiga Siman oo Qalalan | | | | |
|---|---|---|---|---|
| Mayl Saacaddii Kasta. | Masaafada Wakhtiga Falcelinta (fiit) | Masaafada bareeg-qabashada (fiit) | Wadarta Masaafada Guud ee Joogsiga (fiit) | Wadarta Masaafada Guud ee Joogsiga ee Qiyaasta Dhererka Gaariga (Dhererka Gaariga = 16 fiit.) |
| 10 | 11 | 9 | 20 | 1 |
| 20 | 22 | 23 | 45 | 3 |
| 30 | 33 | 45 | 78 | 5 |
| 40 | 44 | 81 | 125 | 8 |
| 50 | 55 | 133 | 188 | 13 |
| 60 | 66 | 206 | 272 | 18 |
| 70 | 77 | 304 | 381 | 25 |

**Waxyaalaha Qaar Ayaa Kaa Ilaalinaya Inaad Aragto:**

- Mugdi. Waa inaad u dhawaato shay si aad u aragto habeenkii marka loo eego maalintii. Waligaa si degdeg ah ha u wadin hana ku joogsa masaafada aad hore uga arki karto iftiinkaaga. Nalalka hore ayaa kuu ogolaanaya inaad si cad wax u aragto oo kaliya 250 fiit oo hortaada ah. Sidaa darteed, haddii aad ku waddo wax ka badan 50 mayl saacaddii kasta waddo mugdi ah, run ahaantii waxaad tahay "indho la'aan."

- Roob, Ceeryaamo, mise Baraf. Roobab aad u culus, duufaan baraf ah mise ceeryaamo weyn, waxaa laga yaabaa inaadan si fiican wax u arki karin, xitaa markaad si gaabis ah u waddo. Haddii ay tani dhacdo, ka bax wadada oo sug ilaa inta xaaladdu ka soo raynayso.
- Isgoysyada. Geedaha, duurka, mise dhismayaasha ku yaal isgoysyada ayaa xannibi kara aragtidaada gawaarida dhinaca ka soo socota. Waxaad u baahantahay inaad si gaabis ah ugu dhawaato isgoyska "arag la'aanta" si aad u awoodo inaad joogsato haddii gaari si lama filaan ah u soo baxo.
- Buuraha iyo Qaloocyada. Marna ma ogaan kartid waxa ku yaal dhinaca kale ee buur dheer ama qalooca fiiqan. Haddii gaarigu kaa damo waa inaad si gaabis ah u socotaa si aad u joogsato. Markaad timaaddo buur dheer mise qalooca, gaabis ku soco si aad u joogsato haddii loo baahdo.
- Gawaarida Baarkiman. Gawaarida lagu baarkimo hareeraha wadada ayaa kaa hor istaagaya aragtidaada. Dadka ayaa laga yaabaa inay diyaar u yihiin inay gaariga ka soo degaan mise ka dhex baxaan baarkinka. Sii gawaarida baarkiman boos badan una diyaar garow inaad joogsato.

**Imisa Gaadiid ayaa Jooga?**

Marka ay jiraan gawaari badan waxaa yaraanaya booska wadista; sidaa darteed, waxa aad haysataa wakhti yar iyo meel aad kaga falceliso. Taraafiko badan waxaa lagaaga baahanyahay inaad yarayso xawaarahaaga si aad u hesho wakhti aad kaga falceliso booska gaaban iyo wakhtiga.

Qaar kamid ah meelaha lagaa rabo inaad dhimto xawaaraha waa:

- Xarumaha dukaameysiga, baarkinnada, iyo goobaha magaalada hoose. Waxaad ku dhex jirtaa gawaari iyo dad isku mar jihooyin kala duwan u socda.
- Taraafiko badan.
- Buundooyinka dhuuban iyo taannalada. Gawaarida isku soo fool leh ayaa ku khasban inay isku soo dhawaadaan.
- Goobaha lacag bixinta wadooyinka dhaadheer. Gawaarida waxay bedelayaan laymanka marka ay soo dhawaadaan oo ay ka baxayaan goobaha lacag bixinta.
- Dugsiyada, garoommada ciyaaraha, iyo waddooyinka xaafadaha.

**Intee in le'eg ayuu Gaadiidku Degdeg u Socdaa?**

Gawaarida isku laynka ku socda isla xawaare isku mid ah iskuma dhici karaan. Shilalku waxay u badanyihiin inay dhacaan marka hal darawal uu ka dheereeyo mise ka gaabiyo gawaarida kale ee waddada.

***Ku wadida taraafiga dhexdiisa:*** Haddii aad taraafiga ka dheerayso (xitaa haddii aad ku jirto xadka xawaaraha la dhejiyay), waa inaad sii waddaa inaad gudubto gawaarida kale. Mar kasta oo aad gudubto gaari kale waxaa laynka fursad badan oo shil sababi karta. Gaariga aad gudbeysa ayaa si lama filaan ah u badalan kara haadka. Waddada labada layn leh ee gawaarida kaa hor imaneysa ayaa si lama filaan ah usoo muuqan karta. Run, waxaa laga yaabaa inaysan ahayn fursad weyn, laakiin haddii aad gudbeyso gaariba gaari, fursadaha ayaa noqonaya kuwo isasoo tara. Sidoo kale, xawaaruhu ma badbaadiyaan wax ka badan dhowr daqiiqadood oo ka baxsan wakhtiga wadista saacadda.

Ka gaabinta gawaarida kale mise inaad si lama filaan ah u joogsato ayaa u xun sidii adoo xawaaraha ku socoda oo kale. Gawaarida ayaa ku urursama gadaashaada waxayna sababi karaan shil xaga danbe ah. Haddii gawaari badan ay kugu soo baxayaan si ay ku dhaafaan, in kasta oo aad ku wadeyso xawaaraha la dhejiyay, waad yara gaabin kartaa mise u soo u bixi kartaa dhinaca midig si aad si badbaado leh laguu gudbo.

***Gawaarida waddada soo galaysa:*** Waxaad u baahan tahay xirfad iyo taxaddar si aad si ammaan ah layn ugu soo gasho waddo bannaan, oo aad si habsami leh ugu biirto gawaarida ku socota xawliga sare. Boos raadso, kadibna ku kordhi xawaaraha laynka laga soo galo oo gal booska u dhexeeya xawaaraha waddada dheer.

***Kabixidda taraafikada:*** Wadada xawaaraha sare, ha gaabin xawaaraha ilaa aad u guurto laynka bixista. Marka aad ka baxdo wadada isgoysyada mise waddo khaas ah, isku day in aadan isla markaaba gaabin mise aad tartiib u socon (wax ka hooseeya 5 ilaa 10 mayl saacad kasta). Aad u gaabinta mise joojinta waxay kordhin doontaa fursadahaaga in dhabarka lagaaga dhaco.

***Ka falcelinta gaadiid tartiib u socda:*** Gawaarida qaar ayaa dhibaato ku qaba in ay la jaan qaadaan xawaaraha gaadiidka. Markaad aragto inay gawaaridan kaa horreeyaan, hagaaji xawaarahaaga kahor intaadan gaarin. Gaabiska degdegga ah waa mida sababta shilalka gaadiidka. Iska ilaali gawaariga waaweyn iyo kuwa yar yar maadaama laga yaabo inay lumiyaan xawaaraha dallacaada mise dagaandagga, marka gawaarida waddada soo galaysa, waxay ku qaataan wakhti dheer si ay u gaaraan xawaaraha. Cagaf-cagafyada beeraha, baabuur-xayawaanka lagu qumiyo iyo gawaarida dayactirka waddooyinka waxay sida caadiga ah socdaan 25 mayl saacad kasta mise wax ka yar. Gawaaridan waxay leeyihiin saddex xagal leh saddex gees oo casaan ah (calaamad gaari gaabis ku socda) oo ku dheggan dhabarka danbe ee gaarigooda.



## Calaamadaha Digniinta

Waxaa jira calaamado badan oo kaaga digaya khatar soo socota. Haddii aad aragto calaamadahan, waa inaad yareysaa xawaarahaaga. Markaa waxaad heli doontaa wakhti aad kaga falcesho haddi ay dhibaato jirto.

Calaamadaha digniinta ku dhawaad had iyo jeer waa jaalle waxayna leeyihiin nakhshad dheyman. Waa kuwan qaar kamid ah kuwa loogu badanyahay:




1. Waxaa kaa horreysa calaamada taraafig.
2. Waxaa jira laynk kale oo taraafig ah oo midigta ku yaal oo galaya laynkaaga hore.
3. Waa jira taraafig labo wado ah.
4. Waddo weyn oo kala qaybsan ayaa hore ku dhamaanaysa.
5. waddo weyn oo kala qaybsany ayaa hore ka bilaabmeysa.
6. Waxaa jirta meel kaa horraysa oo inta badan ay deerada ka gudubto waddada.
7. Laynka midig wuxuu ku dhamaanayaa hore (gal bidix).
8. Baaskiillada mise baaskiilka ayaa ku hor gudbaya, fiiro gaar ah u yeelo.
9. Isgoys ayaa kaa horreeya.
10. Waxaa kaa horreysa calaamada joogsiga.

## Maareynta Masaafada

Inta badan ee aad u ogolaato inta u dhaxaysa gaarigaaga iyo isticmaalayaasha kale ee waddada, ayaa ah inta badan ee aad naftaada siiso si aad uga falceliso. Tani waxaa lagu magacaabaa masaafo ku xeeran. Had iyo jeer isku day inaad heysato masaafo badbaado leh oo ku xeeran gaarigaaga.

**Ilaalinta Masaafo Ammaan ah**

Marka darawalku khalad sameeyo, darawallada kale waxay u baahan yihiin wakhti ay kaga falceliyaan. Sida kaliya ee aad ku xaqiijin karto in aad heli doonto wakhti kugu filan oo aad kaga falceliso waa adiga oo ka taga meelo badan oo u dhexeeya gaarigaaga iyo gawaarida kugu xeeran. Meeshaasi waxay noqotaa "barkin boos bannaan" kaasoo kaa ilaalinaya kuwa kale. Guud ahaan, waa inaad isku daydaa inaad baarkin meel ah ku haysato dhammaan dhinacyada gaarigaaga taasoo ah inay si habboon u tixgeliso xawaaraha jira iyo xaaladaha waddooyinka.

**Masaafada Hortaada ah**

Raacitaanka aadka u dhow ayaa xaddidaya aragtidaada waddada. Ma ogola wakhti falcelin ku filan si la isaga fogeeyo shil. Hayso ugu yaraan 4 ilbiriqsi inta u dhaxaysa gaarigaaga iyo gaariga kaa horreeya.

Si loo go'aamiyo masaafadaada daba socodka:

- Eeg marka gaariga kaa horeeya gadaashiisa uu dhaafo calaamad, baalle mise meel kale oo go'an.
- Tiri ilbiriqsiyada ay kugu qaadanayso inaad isla bartaas gaaro (“Kow-kun-kow, kow-kun-labo, kow-kun-saddex, kow-kun-afar”).
- Si dhow baad u daba socotaa haddii aad ka gudubto bartaas kahor intaadan tirin 4 ilbiriqsi.
- Gaabi xawaaraha oo hubi masaafadaada cusub ee daba socodka. Ku celiceli ilaa daba socodkaaga uu ugu yaraan uusan u dhaweyn afar ilbiriqsi.




Badka Dabagalka ee ugu Yar ee 4 Sikin ah

Xaaladaha qaarkood, waa inaad ogolaataa boos dheeraad ah. Afar ilbiriqsi dheer iyo wax dheer oo daba socod ah ayaa laga yaabaa in loo baahdo inta lagu jiro xaaladaha xun.

Had iyo jeer kordhi masaafada daba socodka:

- Waddooyinka simbiririxashada. Waddooyinka simbiririxashada. Haddii gaariga kaa horreeyaa uu gaabiyo mise joogsado, waxaad u baahan doontaa masaafo badan si aad u joojiso gaarigaaga.
- Markaad daba socoto mootooyin mise baaskiillo. Haddii baaskiil wadaha dhoco, waxaad u baahan doontaa masaafo dheeraad ah si aad uga fogaato inaad ku dhacdo wadaha. Fursadaha dhicitaanku

waxay ku badan yihiin waddooyinka qoyan mise barafka leh, meelaha biraha leh (sida buundooyinka mise jidadka tareenka), mise jayga leh.

- Marka darawalka kaa dambeeya uu rabo inuu gudbo, xoogaa gaabis kusoco inta ay gudbayaan si aad u caawiso darawalka gudbaya.

- Markaad daba soconeyso gawaarida waaweyn mise kuwa isjiidka ah kaas oo aragtidiisa danbe laga yaabo in la xannibo. Darawalada gawaarida xamuulka, basaska, basaska, mise gawaarida jiidaya dadka kaamamka aada mise gawaarida si fiican kuuma arki karaan haddii aad aad ugu dhowdahay. Waxay si lama filaan ah u gaabin karaan iyagoon ogayn inaad ka danbeyso.
- Markaad daba socoto gawaarida xamuulka, cagaf-cagafyada iyo basaska, waxaa jira dhawr waxyaabood oo ay tahay inaad maskaxda ku hayso:
    - Si dhow ha u daba socon oo darawaladoodu aanay kaa arki karin muraayadahooda dambe mise aragtidaada jidka kaa horreeya ayaa xannibmeysa.
    - Gawaarida xamuulka ah iyo basaska ayaa inta badan sameeya leexashooyin ballaaran, iyagoo ka tagaya meel banaan oo dhanka midig ah inta ay socoto howsha. Haka gudbin gawaarida noocaan ah dhanka midig haddii ay jirto fursad ah inay u leexanayaan dhanka midig.
    - Gawaarida waaweyn waxay helayaan xawli la taaban karo marka ay hoos u dagaan dagayaan oo badanaa lumiyaan xawaaraha marka ay fuulayaan buur. Ku xisaabtan arrimahan markaad go'aansanayso inaad gudubto gaari weyn iyo in kale.
    - Ka tag meel hortaada ah marka lagu joogsado gaari xamuul gadaashisa mise baska isgoysyada, gaar ahaan buur, haddii ay dhacdo in gaarigu dib usoo yara noqdo kahor inta uusan hore u kicitimin.




- Habeenkii, ceeryaameysan, mise cimmillo xun.

- Markaad daba socoto gawaarida joogata isgoysyada tareenada, sida basaska taraansitka, basaska dugsiga mise gawaarida sida walxaha khatarta sida. Basaska dugsiga iyo booyadaha taangiyada sida dareerayaasha guban kara waa in ay joogsadaan dhammaan isgoysyada tareenada sidaa darteed filo joogsiyada oo wakhti hore gaabi xawaaraha si aad u ogolaato meelo badan oo aad joogsan karto.

- Markaad waddo rar culus mise aad jiidayso trailer, miisaanka dheeraadka ah wuxuu kordhiyaa masaafadaada bareeg-qabashada.

- Marka xawaaruhu sarreeyo.

- Waa inaad sidoo kale ogolaataa baarkin bannaan marka laguu joogsado buur. Gaariga kaa horreeya waxa laga yaabaa inuu dib kuugu soo laabto marka la kicinayo.

**Masaafada Dhinacyada**

Waxaad u baahan tahay boos meel bannaan oo dhinaca ah si aad u hesho meel aad kaga falceshid dhaq-dhaqaaqyada lama filaanka ah ee gawaarida kale laynkaaga usoo dhaqaaqaan. Boos bannaan oo ku yaal dhinacyada gaarigaaga ayaa kuu oggolaanaya inaad u dhaqaaqdo midig mise bidix.

- Ha barbar socon gawaarida kale gudaha wadada laynkaaga badan maxaa yeelay waxaa laga yaabaa inaad ku jirto goobtooda aan muuqan. Ku barbar wadista waxay yaraynaysaa booska aad u baahan karto si aad iskaga ilaaliso shil haddii qof kugu cariiriyo haadkaaga mise uu isku dayo inuu si lama filaan ah u beddelo haadka. Ama joogso gaariga kale hortiisa laynkaaga dib isku dhig.
- Ha ciriirin xarriiqa dhexe. Hayso inta aad awooddo inta u dhaxaysa adiga iyo gaadiidka soo socda. Saarnow dhanka midig marka laga reebo inaad gudubto. Markaad joogtid laynka ku xiga xariiqda dhexe, ma jirto meel aad kaga baxsato. Gaariga soo socdaa wuu ka leexan karaa xarriiqa dhexe mise u leexan karaa isagoon tilmaam bixin.
- Meel bannaan u samee gawaarida gelaysa waddooyinka laynka badan adigoo ku dul wareegaya haad mise gaabis ku socda.
- Marka la joogo jidadka laga baxo ee xorta ah, ha la socon gawaarida kale. Darawalka wadada xorta ah ee bidixda ayaa laga yaabaa inuu si lama filaan ah uga baxo mise darawal kasii baxaya ayaa si lama filaan ah ugu soo laaban kara wadada weyn.
- Meel bannaan ha idiin dhaxeyso adiga iyo gawaarida baarkiman. Qof ayaa laga yaabaa inuu ka baxo gaari, inta u dhaxaysa gawaarida Baarkiman mise gaari ayaa laga yaabaa inuu si lama filaan ah uga soo baxo goobta baarkinka.
- Sii boos dheeraad ah dadka lugeynaya, carruurta, iyo baskiil-wadeyaasha.
- Marka cagaf-cagaf ku gudubto, u dhaqaaq dhanka midig ee laynkaaga. Meel bannaan adig qudhaada isa sii marka cagaf-cagafku ku gudbayo.



**Masaafada Dambe waxay Saameeysaa Masaafada Daba socodka**

Masaafo daba socod dheeraad ah isa sii kahor intaadan yareynin xawaaraha mise leexan. Dareewalka kaa dambeeya ayaa kaaga kontorool badan booska kaa dambeeya marka loo eego adiga. Hase yeeshee, waxaad ku caawin kartaa in aad xawaari daggan iyo tilmaam siiso kahor markaad qorshaynayso in aad gaabiso mise leexato.

Haddii si dhow laguula socdo oo uu jiro layn dhankaaga midigta, u gudub si aad ugu dhiirigeliso darawalka kale inuu gudbo. Haddi aanay jirin layn sax ah, sug ilaa jidka hore ka faaruqo, kadib xawliga si tartiib ah u gaabi si aad ugu dhiirigeliso ka ku daba socda in uu gudbo.

**Farqiga Kala soocidda**



Mararka qaar waxaa jiri doona khataro ka iman doona labada dhinac ee wadada. Waxaa laga yaabaa inay jiraan gawaari ku baarkiman midigta iyo gawaari ka soo socota dhanka bidix. Xaaladdan oo kale, u gudub qeybta dhexe ee u dhaxaysa gawaarida soo socota iyo kuwa baarkiman. Kala sooc farqiga.

**Mid mid u Waajihidda Khataraha**

Mararka qaarkood waxaad leedahay laba khatarood oo aad isku mar waaajahdo. Ka soo qaad inuu jiro gaari dhanka bidix kaaga soo socda iyo baaskiil kaaga soo socda dhanka midig. Halkii aad ka dhex mari lahayd, mid mid u waajah. Gaabi xawaaraha, gaariga haku gudbo, kadibna u dhaqaaq bidix si aad u oggolaato boos badan (saddex fiit) markaad ka gudubto baaskiil-wadaha.



Ha gudbin wali. Sug ilaa gaariga soo socda uu gudbo baaskiilka.

Kadib ka bax oo gudub baaskiilka.

**Boos la wadaagista Isticmaalayaasha Waddooyinka Kale**

Markaad ku jirto gaadiid socda, waxaad xakameyn kartaa xawaaraha iyo booska gaariga si aad u ilaaliso boos bannaan oo kugu xeeran. Hase yeeshee, markaad u dhawaato safka taraafiga, waa inaad booska la wadaagto gawaarida hore u joogtay. Mid kamid ah dhibaatooyinka ugu weyn ee darawallada ayaa ah inay qiimeeyaan inta boos ee ay u baahan yihiin.

Baro inaad qiimeyso inta boos ee ay tahay inaad ku biirto taraafikada, si aad uga gudubto ama u gasho gaadiidka iyo inaad dhaafto gawaarida kale. Xasuusnoow, marka aad sameyso mid kamid ah dhaq-dhaqaaqyadan waa inaad siisaa waddo siin ah xaqa ka hormaista gawaarida kale. **Waa masuuliyaddaada inaad u ogolaato boos ku filan oo aad ka ilaaliso faragelinta gaadiidka joogay.**

**Booska ku Biiridda**
Mar kasta oo aad ku biirto gaadiidka kale, waxaad u baahan tahay farqi afar ilbiriqsi ah si aad si aammaan ah ugu biirto. Taasi waxay ku siin doontaa adiga iyo gaariga kaa dambeeya masaafo ammaan ah. Waxaad u baahan tahay farqi afar ilbiriqsi ah mar kasta oo aad bedesho haad mise aad waddo bannaan ka soo gasho haadka laga soo galo mise aad ku biirto waddo kale.

- Ha isku dayin inaad isku cariiriso meel bannaan oo aad u yar. Isku bannee boos bannaan oo weyn oo kugu filan.
- Haddii ay tahay in aad dhowr haad ka gudubto, mid mid u badel haadadka. Haddii aad joogsato si aad u sugto ilaa dhammaan wadooyinku ay faaruq noqdaan, waxaad xiri doontaa gaadiidka waxaana laga yaabaa inaad sababto shil.

**Boos Gudbid mise Galid**

Mar kasta oo aad joogsi dhammaystiran kaga gudubto mise gasho taraafik, waxaad u baahan doontaa boos weyn. Si aad dhaqaaq u sameyso adigoo si buuxda u joogsaday, waxaad u baahan tahay boos ah:

- Qiyaastii nus baloog oo ku taal waddooyinka magaalada,
- Qiyaastii baloog buuxa oo waddo dheer ah.

Si aad u gasho haadka taraafikada jirta, waxaad u baahan tahay wakhti yar oo dheeri ah si aad u dhamaystirto leexashadaada oo aad kor ugu qaaddo xawaaraha gawaarida kale. Waxaad u baahantahay boos ah:

- Qiyaastii saddex meelood laba meel oo baloog magaalada gudaheeda ah,
- Qiyaastii labo baloog oo waddo dheer ah.

Markaad ka gudubto taraafikada, waxaad u baahan tahay boos kugu filan si aad u gudubto.

- Joojinta kala barka waa ammaan kaliya marka uu jiro qaybiye dhexdhexaad ah oo ku filan inuu celiyo gaarigaaga.
- Haddii aad goyso mise leexanayso, iska eeg in aanay jirin gawaari mise dad xannibaya waddada kaa horeysa mise waddada dhinaca xigta. Uma baahnid in lagugu celiyo isgoys ay gaadiidku kugu dhibayaan.
- Xitaa haddii aad tahay markaaga, ha ka bilaabin hortaada haddii ay jiraan gawaari jidka kaa xannibaysa. Haddii lagugu qabto isgoyska marka nalka is beddelo, waxaad xannibi doontaa taraafikada.
- Marnaba ha u qaadan in darawal kale uu booska kula wadaagi doono. Ha u leexan haad sababtoo ah gaariga soo socda ayaa leh tilmaaan daaran. Darawalka waxa laga yaabaa inuu qorsheeyo inuu meel gadaashaada ah u dhow ka leexdo. Mise waxaa laga yaabaa in tilmaamahoodu lagu sii daayay inay shidnaadaa leexasho hore. Tani waxay u badan tahay inay ku dhacdo mootooyinka sababtoo ah tilmaamahooda had iyo jeer ma aha kuwo is damiya. Sug ilaa darawalka kale uu bilaabo inuu leexdo kahor intaadan dhaqaaqin.

## La xiriiridda

Shilalku waxay badanaa dhacaan sababtoo ah hal darawal ayaan arkin darawal kale. Mise marka hal darawal sameeyo wax darawalka kale aanu filanayn. Darawalladu waa inay ogeysiiyaan kuwa kale halka ay joogaan iyo waxa ay qorsheynayaan inay sameeyaan iyagoo la xiriiraya. Isla xiriiridda iyadoo la isticmaalyo gaariga waxa loo sameeyaa habab kala duwan oo ay ka mid yihiin:

**Dareen soo jiidasho**

***Isticmaal nalka hore*** – Daarista nalalka hore waxay ka caawisaa isticmaalayaasha kale ee waddooyinka inay ku arkaan. Marka laga soo tago inay ku caawiyaan inaad wax ku aragto habeenkii, nalalka hore waxay caawiyaan dadka kale inay ku arkaan maalinta sidoo kale. Khaasatan:

- Roobka, barafka, mise ceeryaamada. Xilliyada roobka, barafka, mise ceeryaamada, aad bay u adagtahay mararaka qaar inay dadaka kale arkaan gaarigaaga. Maalmaha cawlan, gawaaridu waxay u muuqdaan inay ku dhex milmeen gaafaha. Sida uu qabo sharciga Maine mar kastoo aragtidu aad u yartahay si aad wax uga aragto 1000 fiit wax ka horreeya mise wakhti kasta marka muraayada musaxayaasha zaa'id loo isticmaalo waa in aad shidaa nalalka hore
- Marka ay nooneyso mugdiga. Haddii aad shiddo nalka hore wax yar ka hor-marka mugdi soo gali rabo-waxaad ku caawin doontaa darawalada kale inay ku arkaan. Sida uu qabo sharciga Maine waa inaad leedahay nalalka hore oo shidan marka aad gaariga waddo laga bilaabo qorrax dhaca ilaa qorrax ka soo baxa.
- Marka aad ka fogaato qorrax ka soo baxa mise qorrax u dhaca.
- Mar kasta oo aad socoto oo nalalku waa lagama maarmaan, isticmaal nalalkaaga hore.
- Ma fiicna in lagu kaxeeyo gaari leh kaliya nalalka baarkinka.
- Shid nalalka hore mar kasta oo ay dhibaato kaa haysato inaad aragto baabuurta kale. Haddii aadan iyagu arki karin, kuma arki karaan.
- Wadayaasha mootada ayaa had iyo jeer looga baahan yahay inay shitaan nalalka hore marka ay mootadu saarantahay wadooyinka Maine.

**Aragtiga Habeenkii ee Wanaagsan**

Way adag tahay in habeenka wax la arko, mugdi awgii, marka loo eego maalintii. Balse waxaad samayn kartaa waxyaabo kor u qaada aragtida habeenkii:

- Isticmaal fallaarah iftiinka sare leh mar kasta oo ay suurtagal tahay. Iftiinka nalalka fallaaraha sare leh ayaa kuu saamaxa inay laba jibaaraan fogaan aragga. Hubso inaad u isticmaashid fallaaraha iftiinka sare waddooyinka kugu cusub, meelaha la dhisayo, mise meelaha suurtagalka ah inay dad joogaan wadada hareereheeda.
- Marka gaari ay ku rakiban yihiin nalal badan oo fallaaro dheer islamarkaana kusoo socda gaari ilaa 500 fiit u jira mise uu daba socdo gaari 300 fiit u jira, darawalka waa inuu gaabiyaa nalalka hore mise u badalaa iftiin hooseeya misena damiyaa nalalka dhaliya ceeryaamada.
- Isticmaal nalalka fallaaraha dheer xilliyada ceeryaamada, barafka, mise roobka culus maadaama nalalka fallaaraha sare dib kuugu soo celin doonaan roobabkaas oo keeni doona dhalaal saamayn doona araggaga.

Haddii gaari kugu soo socda oo leh nalalka fallaaraha saee, oo uu ku guuldareysto inuu kaa gaabiyo, gaabi xawaaraha oo u fiirso dhanka midig ee waddada. Tani waxay kaa ilaalin doontaa inaad ku indho beesho nalalka hore ee gaariga kale. Waa inaad sidoo kale waa inaad aragti ku filan leedahay si aad u aragto qarka haadka ay tahay inaadan ka bixin ee waddada ilaa uu gaariga gudbo.



Ha isku dayin inaad "ku laabato" darawalka kale adigoo nalalkaaga ay wali daaranyihiin. Haddii aad sidaas sameyso, labada darawal waxba ma arki doonaan.

*Isticmaal hoonkaaga* – Dadku kuma arki karaan ilaa ay jihadaada eegayaan mooyaane. Hoonka waxaa loo isticmaali karaa in lagu soo jiito dareenkooda. Isticmaal mar kastoo ay kaa caawin doonto ka hortagga shil. Hoonka ayaa si khaldan loo isticmaali karaa. Waa inaadan hoonka u isticmaalin sabab la'aan mise kaliya inaad buuq qaylo ah sameyso bilaa sabab ah. Si dabacsan u taabo hoonka; si wanaagsan ugu sii hormari, si aad dadka kale ugu wargaliso inaad halkaas joogto. Isku day inaad ka fogaato isticmaalka hoonka marka aad u dhowdahay baaskiil wadeyaasha mise fardaha sababtoo ah wadaha mise faraska waxaa laga yaabaa in ay argagaxaan, lumiyaan xakamaynta, oo ay ka baxaan wadada. Balse haddii aad khartar u dhowdahay, haka baqin inaad yeeriso cod dheer. Si **dabacsan** u taabo hoonka marka:

- Dadka lugaynaya mise baaskiil wadayaasha ayaa u muuqda inay ku sii socdaan haadkaaga safarka
- Gudbidda darawal bilaabay inuu usoo leexdo haadkaaga
- Darawal fiiro gaari ah u hayn mise waxaa laga yaabaa inay dhib ku noqoto inuu ku arko

***Inaadan isticmaalin hoonkaaga*** - Isticmaal hoonkaaga kaliya markaad u baahan tahay inaad u baaqdo isticmaalayaasha wadada oo maaha kaliya inaad cabsi geliso kuwa kale.

***Tilmaam***

Had iyo jeer tilmaam bixi **kahor** intaadan leexan mise aadan gaabis ku socon.




*U sii horumari tilmaam* – Sii wakhti ay kuwa kale kaga fal celiyaan. Tilmaam bixi markaad beddeleyso haadka, leexanayso mise marka lagu biirayo gaadiidka. Xaqiiji inaad damiso tilmaamta intaa kadib. Markad leexaneyso meel ka shishaysa waddada dhinaceeda, ha shidin tilmaamtaada leexashada ilaa aad ka gudubto waddada dhinaceeda.

*Tilmaam bixi marka xawaaraha aad dhimeyso* - Nalalka bareega waxay ogeysiiyaan kuwa kale inaad gaabinayso. Taabo badeelka bareegaaga marka:

- Aad ka dageyso wado aan laheyn leexasho kala qeybisa mise haad bixitaan.
- Baarkimida mise leexashada isgoys intaan la gaarin.

**Tilmaamida Jiho Beddelashada**

Darawallada kale waxay kaa filayaan inaad u kaxeyso isla jihadii. Haddii aad rabto inaad jihada bedesho ogeysiikuwa kale adigoo ugu tilmaamaya fareejooyinka mise gacanta. Tilmaamaha wakhtiga ku habboon la bixiyo waxay siinayaan darawalada kale wakhti ay kaga falceliyaan.

Had iyo jeer tilmaam bixi kahor intaadan:

- Layn Baddelan,
- Isgoys ka leexan
- Galin mise ka bixin wado bannaan
- Galin mise ka bixin baarkin
- Ku leexan waddo

Waa fikrad wanaagsan in sidoo kale tilmaam la bixiyo kahor intaadan:

- Kasoo bixin cirifka mise u bixin waddada dhankeeda si aad u joogsato

Haddii aadan bixin tilmaam, darawallada kale ma ogaan doonaan waxaad qorsheyneyso inaad sameyso. Si loo hubiyo in kuwa kale ogaadaan:

- Caado ka dhigo inaad bixiso tilmaam mar kastoo aad jiho bedelenayso. Tilmaam bixi xitaa marka qof kale uusan kaa ag dhaweyn. Waa gaariga aadan arag ka ugu khatarta badan.
- Calaamad bixi sida ugu dhakhiyaha badan ee aad awooddo ugu yaraan 100 fiit kahor intaadan isbeddelin mise leexan.
- Isticmaal tilmaamta gacanta haddii tilmaamaha leexashada aysan shaqeeneyn.
- Haddii aad qorsheyneyso inaad ka leexato isgoys gadaashiis, tilmaam isgoyskaas ka dib. Haddii aad tilmaam bixiso kahor isgoyska, darawal kale ayaa laga yaabaa inuu fikrad khaldan ka helo isgoyskaas oo uu jidkaaga soo galo.
- Markaad leexato kadib mise badalato haad, xaqiiji inaad damiso tilmaamta.

**Tilmaamta Gacanta**



Bidix leexasho | Midig leexasho | Gaabinaya mise joogsanaya

**Isticmaal Tilmaamaha Gurmadka**

Haddii gaarigaagu ku hallabo waddada dheer, hubi in darawalada kale ay arki karaan. Shilalka qaar waxay dhacaan sabab ah in darawalka uu arki waayo gaari taagan ilaa uu aad uga daaho inuu iska fogeeyo inuu ku dhaco.

Haddii gaariga cillad kaa haysato oo ay tahay inaad istaagto dhinaca wadada:

- Haddii ay suurtagal tahay, ka soo wada bax waddada si aad si fiican uga baxdo gaadiidka.
- Daar fareejooyinkaaga gurmadka.
- Haddii gaarigaagu lahayn fareejooyin, isticmaal tilmaamaha leexashada habboon.
- Daboolka matoorka sare u qaad si aad u tilmaamto gurmad.
- Haddii aadan gabi ahaanba ka bixi karin wadada, isku day inaad istaagto halka ay dadku ku arkaan aragti cad.
- Isku day inaadan ku joogsan buur dusheeda mise hareeraha goob qaloocan.
- Aad ugu dig gawaariga kale. Haddii aad qabtid ololka gurmadka dhig ugu yaraan 100 fiit gaariga gadaashiisa (Gawaarida waaweyn waa inay dhigaan 3 aalado gurmad ah meelo cayiman). Tani waxay u ogolaanaysaa darawallada kale inay beddelaan haadka haddii ay u baahan yihiin.
- Haddi aanad qabin ololka gurmadka, istaag wadada dhinaceeda, oo u gacan haati gaadiidka kugu xeeran. Isticmaal maro mise calan haddii aad heysato. Ka fogow waddada. Xataa ha beddelin taayirka haddii ay la macno tahay inaad istaagto haadka taraafikada.

**Dhigidda Gaarigaaga Meel laga Arki karo**

- Ku kaxee meel lagaa arki karo. Haku kaxeen barta aan muuqan ee darawal kale.
- Isku day in aad iska ilaaliso in aad labada dhinacba iyo inaad wax yar usii dhawaato gadaasha gaari kale muddo dheer. Ama dhaqso ama dib u soo laabo si aad haadkaas u bannayso oo marka lagugu arko.
- Markaad gudubto gaari kale, uga gudub meesha uu darawalka kale ku leeyahay barta aan muuqan sida ugu dhakhsiyaha badan ee aad awoodid.

**Su'aalaha Muraajacada ee Qaybta 8:**

1. Ugu yaraan imisa ilbiriqsi ayay darawallada wanaagsan isugu dayaan inay hore ka arkaan?
2. Waxaad joogtaa calaamad joogsi. Gaari ayaa dhanka bidix kasoo socdaa kaas oo leh calaamad jihayneed bigbigleyneysa taasoo muujinaysa midig leexashada jidka aad ku dhowdahay. Ma ammaan baa in la maleeyo in gaarigan oo leexan doono?
3. Run mise Khalad? Waa inaad isticmaashaa fallaaraha iftiinka hooseeya xilliga ceeryaamada, barafka mise roobka weyn.
4. Habraacyadee ayaa ah inaad raacdo marka ay dhibaato baabuur ku haysato oo ay tahay inaad joogsato?
5. Waa maxay xawaare ammaan ah?
6. MARKA LAGU SOCDO 50 MAYL SAACADDII KASTA waxay qaadataa qiyaastii ________ fiir si loo joogsado?
7. Waa kuwee tilmaamaha taraafikada ee had iyo jeer u badan jaalle, iyo naqshada dheymanka?
8. Haddii aan si kale la dhejin xawaare noocee ah ayay tahay inaad ku safarto markaad dhex marayso goob ganacsi?
9. Maxaad sameyneysaa haddii aad ku dhex waddo roobka, baraf mise ceeryaamo, oo aad bilowdo inay kugu adkaato inaad wax ka aragto hortaada, dhinac mise gadaashaada?
10. Markaad daba socoto gawaarida xamuulka, cagafcagafyada iyo basaska, waa maxay tixgalinta wadista ee ay tahay inaad maskaxda ku hayso?
11. Run mise Khalad? Dareewalka kaa dambeeya ayaa si toos ah u maamula booska kaa dambeeya marka loo eego adiga.

# QAYBTA 9
# Ka fogaanshaha Shilalka

## Gurmadka iyo Ka fogaanshaha Shilalka

Haddii aad samayso dhammaan waxyaalaha buug-gacmeedkani sheegayo, waa suurtagal inaadan waligaa yeelan xaalad degdeg ah. Balse qofna ma fiicna sidaas darteed fursadaha waa waxyaabo lama filaan ah ayaa dhici **doona** . Haddii aad si fiican u diyaargarowdo, waxaad awoodi doontaa inaad si sax ah oo degdeg ah uga jawaabto si aad uga fogaato shil. Marka ay u muuqato in uu shil dhaco, darawallo badan ayaa si fudud u qabta bareega inta ay awoodaan. Tani waxay xiraysaa kaliya taayarada, oo waxay ka dhigtaa gaariga mid boodbooda, waxay kuu keentaa inaad lumiso kontoroolka, oo ay wax sii hallaabaan.

Bareeg-qabashada waxa laga yaabaa inay tahay waxa saxda ah ee la sameeyo, balse maaha waxa **kaliya** ee la sameeyo. Marka xaaladda degdega ahi dhacdo, haddii aad diyaarsan tahay, waxa laga yaabaa inaad ka fogaato shil. Waxaad haysataa saddex wadiiqo oo aad isaga ilaalin karto shil mise aad ku yarayso saamayntiisa; bareeg-qabashada, isteerinka, mise xawaaraha.

### Bareeg-qabashada

Ficilka ugu horreeya ee darawallada intooda badan waa inay joogsadaan. Bambeynta bareegyada ayaa guud ahaan ah wadiiqada ugu fiican ee lagu joojiyo gaari xaalad degdeg ah. Bambeynta waxay ka dhigtaa gaariga inuu si dhakhso ah u joogsado iyadoo kuu sahlaysa inaad sii wadato isteerinka. Haddii aad haysato bareegyada aay xirmin, si fudud hoos ugu riix bareega oo u ogolow gaariga inuu qabto shaqada. Gaadiid badan oo cusub ayaa leh ABS (Sistamka Bareeg-qabashada aan Isxirin). Bareeg-qabashada sistamka ABS wuxuu kaa caawinayaa inaad joogsato adigoon iska simbiririxan. Waxay caawisaa joogteynta xakamaynta isteerinka. Hubi inaad akhrido buug-gacmeedka mulkiilaha gaariga ee kusaabsan sida loo isticmaalo ABS. Sharciga isticmaalka ABS waa:

- Cadaadi bareega gaariga sida ugu adag ee aad awoodid oo sii wad cadaadiska.
- ABS kaliya wuxuu shaqeeyaa haddii aad cadaadis ku saarto bareega gaariga. Waxaa laga yaabaa in badeelka gariiro, waxaana laga yaabaa inaad maqasho shanqar gujin. Tani waa caadi.
- Weli waad sii socon kartaa adigoo ku hawlan ABS.
- Haddii gaarigu bilaabo inuu simbiririxdo, si dhakhsi ah uga kac bareega. Dabadeed hoos u riix mar kale.
- Adeegso ficilkan dhakhso bambeynta ilaa gaarigu joogsado.

Bareeg-qabashada kontoroolsan waxay u joojisaa gaariga xitaa si dhakhso leh balse waxay u baahantahay xirfad dheeraad ah. Waxaad u baahantahay inaad dareento bareega iyo isteerinka. Hoos u riix badeelka bareega ilaa wax yar kahor inta aysan taayarada isxirin (haddii aadan lahayn ABS), mise ilaa aad dareento inaad u baahantahay kontorool isteerin badan. Dabadeed, sii daa bareegyada. Ku celiceli arrintan ilaa gaarigu gabi ahaanba joogsado.

Haddii gaarigaagu uusan lahayn ABS, tixraac buug-gacmeedka milkiilaha gaarigaaga sida ugu wanaagsan ee loo isticmaalo bareegyada.

### Isteerin Wareejin

Waxaa laga yaabaa inaad ka fogaato isku dhac adigoo khatarta ka leexda. Haddi aad aragto in aanad joojinayn wakhtiga ku habboon si aad iskaga ilaaliso inaad wax ku dhacdo, ka leexo. Diiradda saar isteerinka. Haddii aad awooddo, ha qaban bareegyada marka aad leexaneyso. Tani waxay yareyneysaa simbiririxasha, gaar ahaan haddii aad dhinac fudud ka leexaneyso.

Si aad si dhakhsi ah ugu leexato waxaad u baahantahay inaad si sax ah u qabato isteerinka. Gacmahaagu waa inay ahaadaan dhinacyada iska soo horjeeda ee isteerinka, meelaha 9 iyo 3 mise 8 iyo 4 ee saacadaha. La qabso inaad sidaan u qabato isteerinka mar kasta.

Si aad uga fogaato shil, ka leexo caqabadaha. Markaad meel ku hubsato, u leexi isteerinka jihada ka soo horjeeda si aad ugu soo laabato haadkaaga balse u diyaar garow inaad si degdeg ah dib ugu soo laabato mar kale waa haddii loo baahdo ee. Tani waa waxa lagu magacaabo "wirfin." Si looga leexdo caqabad si dhakhso ah:

- Xaqiiji inaad si fiican isteerinka ugu hayso labada gacmood.
- U soco jihada aad rabto inaad aado balse isku day inaad ka fogaato gaadiidka kale.
- Marka aad seegto khatarta, toosi gaarigaaga oo gaabis kusoco.

Ka digtoonow markaad 'wirfinayso' sababtoo ah dad badan ayaa ka fogaada hal shil oo kaliya oo sababa inay mid kale ku dhacaan.

**Xawaarayn**

Mararka qaar waa lagama maarmaan in la xawaareeyo si looga fogaado isku dhac. Tani waxay dhici kartaa marka gaari kale kaaga dhici doona dhinac mise gadaal. Gaari geer qaato, waxa laga yaabaa inaad u baahato inaad u beddesho geer hoose oo aad dhulka la dhigto sheellaraha. Haddii gaarigu yahay ootamaatig, waxaad samayn kartaa wax la mid ah adigoo dhulka la dhigaya sheellaraha.

Waa sharci-darro in darawal uu akhriyo tabeellayaasha isagoo gaari wada. Tabeellayaasha kuma jiraan khariidad mise jihooyin tilmaamaya goob khaas ah.

**Is-difaacid xilliga Isku dhaca /**

Waa suurtagal inaadan marwaba iska ilaalin isku dhac. Isku day wax kasta oo aad awood si aan laguugu dhicin. Haddii ay waxba kuu shaqeyn, isku day inaad iska ilaaliso in dhaawacu noqdo mid aad halis u ah:

**Haddii gadaal lagaaga dhici rabo:**

- Diyaar u noqo inaad qabato bareegaaga si aan lagugu riixin gaari kale.
- Isku xajji isteerinka iyo kursiga dhexdooda.
- Haddii gaarigaagu leeyahay barkinta madaxa, si adag ugu cadaadi madaxaagadaashiisa barkinta.

**Haddii dhinac lagaaga dhici rabo:**

- Isku xejji isteerinka si aad uga ilaaliso in lagu tuuro dhinaca kale ee gaariga.
- U diyaargarow inaad si degdeg ah u socoto si haddii gaarigu kula gaaf wareego aad isku daydo inaad xakamayso gaariga.

**Haddii hore lagaaga dhici rabo:**

- Haddii aad xiran tahay suunka garabka, isticmaal gacmahaaga si aad u ilaalishato wejigaaga.
- Haddii aanad isticmaalayn suunka garabka, isku tuur kursiga si aadan ugu dhicin isteerinka mise muraayada hore.

**Shilalka**

Haddii aad gasho shil:

- Mar qura istaaji gaarigaaga oo gaarsii dhammaan gargaarka suurtagalka ah qof kasta oo dhaawacmay una soo dir ambalaas haddii loo baahdo. Ha qaadin qof dhaawacan ilaa ay jirto khatar kale oo u baahan in loo qaado meel badbaado ah.
- Joog goobta ilaa ay bilaysku ka imanayaan oo ay waydiinayaan qof kasta oo ku lug leh.
- Haddii aad awooddo, ka saar gaarigaaga wadada si aadan u xirin isu socodka.
- Hel magacyada iyo ciwaannada dhammaan dadka shilka galay iyo markhaati kasta. Sidoo kale hubi inaad heshid magacyada iyo ciwaannada qof kasta oo dhaawacmay.
- Diiwaangali macluumaadka darawalka kale:
    - Magac iyo ciwaan (hubi magaca darawalka inuu shatiga ku qoranyahay)
    - Naqshada, moodalka iyo sannadka gaariga
    - Lambarka shatiga darawalka
    - Lambarka shatiga taargada
    - Magaca Shirkadda Caymiska
    - Waxyeellada gaartay gaarigiisa mise gaarigeeda

Qoraal ka samee:

- Wakhtiga, taariikhda, iyo goobta shilka
- Goobta iyo jihada ay u socdaan gawaarida iyo dadka lugaynaya kahor iyo kadib shilka
- Cimmillo xun mise xaaladaha waddada
- Had iyo jeer la xiriir bilayska haddii uu jiro dhaawac. Sii bilayska macluumaadka kusaabsan shilka wakhtiga shilku dhacay. Runta oo kaliya sheeg.
- Haddii gaari baarkiman waxyeelo gaarto, isku day inaad hesho mulkiilaha. Haddii mulkiilaha la waayo ku dhaaf qoraal meel uu mulkiiluhu ka heli karo. Qoraalku waa inuu kamid ahaadaa:
    - Magacaaga iyo cinwaankaaga
      Lambarka shatiga darawalka
      Lambarka taargada
    - Taariikhda iyo wakhtiga shilka
    - Faahfaahinta waxyeellada hantida

Haddii shilku dhaliyo wax dhaawac ah, mise waxyeello hanti oo dhan $2,000 mise kabadan, darawalladu waa inay ku wargeliyaan bilayska mise Sarkaalka deegaanka. Ku guuldaraysiga in la soo sheego shil waxa ay keeni kartaa eedaymo dambi iyo ka xannibida shatiga darawalka.

Darawallada gala shilalka aan la soo wargalin ee dhaliya dhaawac mise dhimasho eey, bisad mise xoolo waa inay "qaadaan tillaabooyin macquul ah" si ay u ogeysiiyaan mulkiilaha, mise haddii mulkiilaha aan la heli karin, sharci fulinta deegaanka mise xakamaynta xayawaanka.

## Gargaarka xaaladda degdegga ah

Haddii aad gasho mise kugu dhaco shil dhaawac shakhsi ah oo qof kale uusan joogin goobta, waa inaad isku daydaa inaad caawiso dhibbanayaasha. Haddii gurmadka caafimaadka gargaarka degdega ah joogaan goobta shilka, raac tilmaamaha oo u fiirso waddada iyo saraakiisha ilaalinta taraafikada, **maaha shilka.**

Waa kuwan qaar kamid ah talooyinka aasaasiga ah ee gargaarka degdegga ah ee la isticmaalo haddii gurmadku aan isla markiiba la heli karin:

- Ha qaadin dhibbanaha ilaa ay lagamamaarmaan u tahay sabab awgeed in dabka mise khatar kale oo nafta halis galineysa. Haddii ay tahay inaad qaaddo dhibbanaha, dhabarka iyo luqunta utoosi sida ugu macquulsan adiga oo gacmahaaga hoos gelinaya dhibbanaha, qabso dharkooda oo ka fogee madaxa dhibbanaha khatarta.
- Haddii fiilooyinka hoos usoo laalaada ay jiraan, ha u dhowaanin. Sug shaqaalaha gurmadka si ay xaaladda wax uga qabtaan. Haddii fiilooyinku ay taabanayaan gaariga mise ay ag yaallaan, uga dig dadka saaran inay gudaha ku jiraan ilaa gurmadku yimaado.
- Hubi haddii dhibbanuhu neefsanayo, haddii kale, billow dibu soo kicinta wadnaha iyo sambabada (CPR), haddii si habboon laguu tababaray, mise afka neef ka sii.
- Waxaad ku caawin kartaa joojinta dhiigbaxa adigoo si toos ah cadaadis u saaraya boogta mise maro nadiif ah, haddii la heli karo. Ku hay cadaadiska ilaa gargaar yimaado. Haddii boogtu ku taallo gacanta mise lugta oo aanay muuqan lafo jaban, sidoo kale si taxaddar leh u qaad lugta si aad u caawiso hoos udhigga dhiigbaxa iyadoo lagu sii haynayo cadaadiska dhaawaca.
- Ha marin boomaato mise dufan meelaha gubtay. Waxaad ku shubi kartaa biyo qabow meelaha gubtay islamarkaana aad maro nadiif ah ku daboosho.
- Qofka dhaawacmay ha siin wax uu cabbo, xitaa biyo.
- Ku dabool dhibbanaha buste mise jaakad si aad u ilaaliso heerkulka jirka oo aad uga hortagto inuu fiigo.

### Rakooyinka

Simbiririxashada waxay dhacdaa marka aad xowli ku safreyso mise aad bareega aad u qabato. Simbiririxashada waxay dhacdaa mar kasta oo shaaggaagu aanu qabsan karin waddada. Inta ay shaaggagu simbiririxanayaan ma leexin kartid gaariga. Haddii gaarigaagu bilaabo inuu simbiririxado:

- Ka sii daa cadaadisa bareegyada mise sheellaraha si aad dib ugu hanato isteerinka.
- Eeg meesha aad rabto inaad aaddo.

### Qorarka/Sagxadaha aan sinnayn

Karakayshanka wuxuu sababi karaa isku dhacyo ilaa aad si sax ah uga adagtahay mooyaane. Ha khalkhalin haddii shaaggagaagu u gudbaan waddada dhankeeda baaxadda karakayshanka leh. Si tartiib ah u gaabi oo ku noqo wadda.

**Haddii shaaggaga midig ee gaarigaagu si lama filaan ah ugu bataan garabka waddada:**

- Ha khalkhalin! Si qumaati ah u qabo isteerinka.
- Ka yara fuq sheellaraha.
- Si adag oo lama filaan ah ha u qaban bareeg. Tartiib u qabo bareegyada.
- Kadib marka aad gaabiso, waad ku laaban kartaa waddada. Kahor intaadan sidaa samayn, iska eeg gaadiid waddada hortaada ah iyo gadaashaada, dabadeen leexo si aad dibu u gashid.

## Ciladaha Gaariga

Had iyo jeer waxaa jirta fursad ah in gaarigaagu wax ka khaldamaan. Waxaad badanaa ka fogaan kartaa dhibaatooyinka gaariga adigoo raacaya jadwalka dayactirka ee buug-gacmeedka mulkiilahaaga. Si kasta oo aad u daryeesho gaarigaaga, mise sida taxadarka leh ee aad u wado, waxaa mar walba jirta fursad uu gaarigaagu ku hallaabi doono oo lagugu qasbi doono in aad si degdeg ah wax uga qabato xaalad aan fiicnayn iyo mid lama filaan ahba. Dhammaantood waa laga adkaan karaa mise la yarayn karaa haddii aad taqaanid waxaad samayn lahayd. Cutubyada soo socdaa waxay muujinayaan qaar kamid ah cilladaha gaariga ee caadiga ah iyo sida ugu wanaagsan ee wax looga qabto. Garashada waxa la sameeyo ayaa badbaadin kara naftaada.

### Bareeg go'id

Iftiinka digniinta bareega ayaa kuu sheegaya in bareegaagu aanu shaqaynayn. Ha wadin haddii aad aragto nalkan digniinta ah. Haddii bareegyadaadu shaqeyn waayaan adigoo gaari wada:

- Bambee bareegyada si degdeg oo xoog ah dhowr jeer. Haddii taasi shaqeyn weydo...
- Isticmaal bareegyada baarkimidda. Barreega baarkinka si tartiib ah u qabo si aad shaaggaga dambe uga ilaaliso inay xirmaan. Diyaar u noqo inaad sii dayso bareegga haddii aad billowdo inaad simbiririxato.
- U wareeg geer hoose oo raadso meel aad gaabis ku socoto oo aad ku baarkimto.
- Isticmaal hoonkaaga iyo nalalka si aad ugu digto darawallada kale.
- Haddii bareegga baarkinka xumaado, dami matoorka oo raadi meel ammaan ah oo aad istaagto. Hubi in gaariga si fiican loo baarkimay meel ka baxsan waddada.
- Kadib gaariga markuu joogsado, caawin raadso. Gaari ha wadin bareeg la'aan ah.

### Bareeg Oolyo leh:

- Had iyo jeer tijaabi bareega kadib markaad ku dhex waddo biyo qoto dheer. Bareegyadu waxay kuu jiidan karaan hal dhinac, mise waxaa laga yaabaa inaynaba shaqayn waayaan.
- "Qallaji" bareegyada adigoo si tartiib ah u wad oo si khafiif ah u qabanaya bareegyada masaafo gaaban.

### Taayar Qarxay

Haddii shaagga hore qarxo, gaarigaagu si adag buu dhanka shaaggu ka qarxay ugu jiidmi doonaa dhulka. Haddii shaagga dambe qarxo, gaarigaagu wuu boodboodi doonaa, gariiri doonaa, oo dhanka shaaggu ka xarqay dhulka kaga jiidmi doonaa. Haddii shaaga banjaro:

- Ha khalkhalin mise bareegyada xoog u qaban.
- Waxaa suurtagal ah aad inuu bidix mise midig u leexdo.
- Si qumaati ah u qabo isteerinka.oo hortaada u soco.
- Si tartiib ah u gaabi. Lugtaada ka qaad sheellaraha.
- U ogolow in gaarigu iskiis u gaabiyo. Si tartiib ah bareegga u qabo kaliya haddii aad ku khasbantahay.
- Wadda ha dhex joogsan. Dhinca ammaan ah uga bax waddada oo daar fareejooyinka gurmadka.

**Sheelaro Katibmay**

Haddii gaarigaagu uu xawaarihiisa faraha ka baxaan:

- Indhaha ku hay waddada.
- Marshada u baddal dhexdhexaad.
- Si tartiib ah bareegyada u qabo.
- Raadso meel ammaan ah aad joojiso gaariga.
- Markaad gaariga joojiso, dami matoorka.
- Haddii aanad dhaafin badeelaha si aanu mar kale kaaga xirmin, raadso caawin hana isku dayin in aad gaaraiga waddo.

**Cilad farsamo**

Haddii gaarigaagu hallaabo, hubi in darawalada kale ay arki karaan. Isku dhacyada ayaa badanaa dhaca sababtoo ah darawallada ma arkaan gaari hallaabay ilaa ay aan la istaagi karin.

Haddii gaari kaa xumaado:

- Ka bixi gaarigaaga waddada meel ka fog gaadiidka.
- Daar fareejooyinkaaga gurmadka.
- U dig kuwa kale ee waddada isticmaala. Dhig nalalka gurmadka meel u jirta 200 ilaa 300 oo fiit gaarigaaga gadaashiisa. Sii darawallada kale wakhti ay ku badalaan haadka mise ay gaabis u socdaan.
- Wac bilayska oo u sheeg waxa hallaabay.

**Haddii matoorkaaga biyo galaan:**

Matoorrada ayaa daad gala marka uu tubbooyinka gaas badan galo. Xaaladdan ayaa ka dhigaysa mid aan suurtagal ahayn in gaaska la gubo.

- Sagxadda gee badeelka sheellaraha oo ku haay meeshaas. Ha bambayn badeelka sheellaraha.
- Wareeji furaha oo sii daa badeelaha marka matoorka kaco.
- Haddii tani shaqeyn weydo, 10 daqiiqadood sug, oo kadib ku celi.

**Haddii gaarigaagu ku istaago waddada tareenka:**

Haddii tareen yimaado oo aad dhaqaajin weydo gaarigaaga, jooji isku dayga oo ka carar. Si aad shil kasta uga fogaato finiinka, ka tag gaarigaaga oo si degdeg ah u aad tareenka soo socda meel ka fog wadda tareenka barta xagasha 45º. Markaad si ammaan leh uga fogaato waddada, wac lambarka telefoonka gurmadka ah ee tareennada (ka raadi calaamad buluug ah oo u dhow oo leh nambarka gurmadka).

**Haddii gaari ku soo socdo laynkaaga:**

- Yeeri hoonkaaga oo ka big sii nalalkaaga si aad ugu digto darawallada kale.
- Si degdeg ah qabo bareeg, balse aad aan degdeg ahayn oo dhalin karta in shaaggagaadu xirimaan oo aad lumiso xakamaynta.
- Si degdeg ah garabka midig u dhib gaariga mise marinka dhuuban. Haku kaxeyn haadka bidix.

**Haddii baytariga gaarigaagu bakhtiyo:**

- Ku dhaji fiilada caawisada dhanka kudarta ee beytariga dhintay.
- Ku dhaji dhanka kel fiilada kajarta ee beytari shaqynaya.
- Ku dhaji fiilada caawisada dhanka kajarta ee beytariga fiican.
- Ku dhaji xirmada ugu dambeeya matoorka gaariga damay.
- Kici gaariga leh baeytariga fiican.
- Kici gaariga leh beytariga bakhtiyay kadib xoogaha dab siinta.
- U ogolow labada gaari inay daarnaadaa dhowr daqiiqadood si beytariga dhinta si buuxda u dab qaato.
- Marka gaari la kiciyo, ka saar xirmooyinka sida ay u kala dambeeyeen ee isku xirka la sameeyay.
- Marna sigaar ha cabbin marka aad dab siineyso gaari oo iska hubi in indhahaaga aad ilaashato.

**Haddii gaarigaagu biyo ku dhex dhaco:**

Gaarigaa leh daaqado iyo albaab xiran waxa laga yaabaa inuu sabbeeyo 3 ilaa 10 daqiiqadood. Waddada ugu fiican ee looga baxsan karo waa daaqadda, sababtoo ah cadaadiska biyaha ayaa adkeynaya in albaabka la furo. Haddii gaarigaagu leeyahay muraayado koronta, u fur sida ugu dhakhsiyaha badan, sababtoo ah biyuhu waxay keeni doonaan maaso.

**Su'aalaha Muraajacada ee Qaybta 9:**

1. Marka la iska fogeynayo shil, darawalku wuxuu leeyahay saddex dookh. Maxay yihiin?
2. Maxay tahay inaad samayso haddii gaarigaagu ku damo waddada tareenka?
3. Haddii bareegyadaadu qoyanyihiin kadib markaad ku dhex waddo biyo qoto dheer, miyaad "qallajin kartaa" adigoo isticmaalaya______?
4. Waa maxay waxa ugu horreeya ee ay tahay inaad sameyso markaad la kulanto gaari kugu soo socda oo haadkaaga ku jira?
5. Waa maxay waxa ugu horreeya ee ay tahay inaad sameyso haddii aad shil gasho?
6. Run mise Been? Had iyo jeer la xiriidh bileyska haddii aad gasho shil uu qof ku dhaawacmay.
7. Ma inaad isku daydaa inaad dhibbanayaasha dhaawaca ah ka soo saartid gaari shil galay?

QAYBTA 10

# Waddo Wadaagid

Qof kasta xaq ayuu waddada u leeyahay. Xusuusnow inaad ahaataa qof edab leh. Darawalladu iaygoo la xiriiraya kuwa kale halka ay joogaan iyo waxa ay qorsheynayaan inay sameeyaan.

## Lugeeyeyaal




Ka darawal ahaan:

- Waa inaad bixisaa waddo siin ah xaqa ka hormarista qof kasta oo goynaya jidka ee meel gudubfarow calaamadaysan.
- Had iyo jeer sii waddo siin lugeeyeyaasha xitaa haddii aysan ku jirin gudubfarowga.
- Marka aaladaha lagu hago taraafikada aanay shaqayn, darawalku waa inuu siiyaa luugeeye waddo siinta xaqa ka hormarista gudaha calaamada gudubfarowga.
- Iska jir lugeeyayaasha gudbaya gudubfarowga. Waxaa laga yaabaa inaan lagu calaamadin calaamadaha digniinta iyo calamadaha waddooyinka.
- Had iyo jiir sii waddo siin dadka qaba naafada aragga. Marka lugeeye uu ka gudbayo waddo leh hagid eey mise uu sito bakoorad cad, waa in aad gabi ahaanba istaagtaa.
- Waddo sii dhammaan lugeeyayaasha xitaa haddii nalka taraafikada cagaar yahay.
- Waa inaadan ka hor marin mise gudbin gawaarida kale ee joogsaday mise gaabiyay si aad waddo u siiso lugeeyayaasha socda gudubfarowga.



- Markaad u leexanayso midig mise bidix (dhif looga ogolyahay Maine) nalka casaanka oo daaran, waa inaad waddo siisaa lugeeyayaasha.
- U fiirso lugeynayayaasha marka aad ku ag wadid gawaari baarkiman mise joogsaday.
- Iska hubi lugeeyayaasha kahor inta aanad dib u bixin, gaar ahaan meelaha baarkinnada.
- Dhin xawaaraha meelaha u dhaw garoomada ciyaaraha iyo goobaha xaafadaha. Carruurtu waxay kasoo dhex carari karaan gawaarida baarkiman dhexdooda sidaa darteed diyaar u noqo inaad si degdeg ah u istaagto.
- Aagga dugsiga marka ay nalal iftiimayaa msie carruur joogaan bannaanka, waa inaad adeecdaa xaddiga xawaaraha. Goobaha looga gudbo dugsiga ee leh ilaalada isgoyska dugsiga waa in aad istaagtaa oo aad siisaa waddo siin sida tilmaamay.
- Ka digtoonow meelaha ay carruurtu ku ciyaarayaan mise ku socdaan.
- Markaad ka gudbayso waddo lugeed, waa inaad siisaa waddo siin dhammaan dadka lugeeynaya mise baaskiil wadayaasha ku sugan waddo lugeedka.
- In kasta oo ay jiraan dhammaan sharciyada, waa in aad taxaddartaa si aad uga fogaato shil dadka lugeeyeyaasha mise baaskiil wadayaasha.

## Baaskiilo

Baaskiillada waxaa loo tixgaliyaa gawaari. Baskiil-wadeyaasha waa inay raacaan isla xeerarka waddada sida gawaarida kale. Baaskiil wadaha waxa uu leeyahay isla xuquuqda iyo mas'uuliyad la midka ah darawallada gawaarida. Waxaa jira ku dhawaad 900,000 oo baaskiilo gudaha Maineoo inta badan baaskiil

wadida waxaa lagu sameeyaa wadooyinka Maine. Ka darawal ahaan waa inaad u waddaa adigoo is ilaalinaya markaad u dhawdahay baaskiil wade sababtoo ah khaladka ugu yar ee adiga mise baaskiil wadahu sameeyo ayaa keeni karaa dhaawac mise dhimasho. Farqiga ugu weyn ee u dhexeeya baaskiil wadayaasha iyo gaariwadeyaasha ka wado isticmaaleyaal ahaan ayaa ah in baaskiiladu aysan muuqan, aamusnaan, oo aan lahayn difaaca buudiga gaariga. ku hareereysan. Tani waxay ka dhigan tahay inaad u baahan tahay inaad u yara ad adagtahay oo aad si taxadar leh u wado markaad la kulanto baaskiil wadeyaasha.

Aad bay u adagtahay in baaskiilka lagu arko gaadiidka dhexdiisa. Raadi oo taxaddar aad ah lahow markaad u dhawdahay.  Baskiil-wadeyaasha waxay leeyihiin heerar xirfado. Baaskiil wadaha xirfadda badan ayaa ah mid saadaal badan oo saf toosan qabsada. Baaskiil wadaha aan xirfadda badneyn ayaa suurtagal ah inuu wirfiyo ogeysiin la'aan, inkira calaamadaha taraafikada iyo tilmaamaha, islamarkaana wada habeenkii nal la'aan. Diyaar u noqo leexashooyin lama filaan ah oo uu sameeyo baskiil-wade.

Waa kuwan qaar kamid ah xeerarka ku caawin kara inaad waddo Wadaag la sameyso baskiil-wade:

- La wadaag waddada baaskiil wadayaasha; waxay xaq sharci u leeyihiin isticmaalkeeda.
- Noqo qof edab leh oo taxaddar leh xitaa haddii ay dib kuu dhigayso.
- Ku sii isgoysyada waddo siin baaskiil wadayaasha, sida adiga oo kale dadka lugeynaya iyo gawaarida kale.
- Sii waddo siinta xaqa ka hor marista marka waddada baaskiilka mise haadka baaskiilku uu ka gudbo wadada. Ha joogsan, baarkimin, mise ku wadin haadka baaskiilka ilaa aad galeyso mise ka baxeyso luuq mise waddo khaas ah mooyaane.



- Gaabi xawaaraha oo oggolow inta aad awooddo marka aad u dhawdahay mise gudbeyso baaskiil.  Ka tag ugu yaraan saddex fiit oo meel bannaan ah inta u dhaxaysa dhinaca midig ee gaarigaaga iyo baaskiil wadaha markaad ka hormareyso. Dhin xawaaraha oo u ogolow baaskiil-wadah isgoys firaaqo ah kahor intaadan leexan.
- Baskiil-wadeyaasha waa in ay ku wadan qaybta saxda ah ee midig ee waddada sida habboon marka laga reebo marka aysan badbaado lahayn in sidaas la sameeyo sida uu go'aamiyo baaskiil wadaha. Mararka qaar, badbaado ayaa ugu jirta baaskiil-wade inuu "amro haadka" isagoo u sii kaxeynaya bartamaha mise bidix haddii uu u leexanayo.
- Baaskiil-wadeyaasha waxaa laga yaabaa inay u socdaan si ka dhakhso badan inta aad garawsantahay (baskiil-wadeyaasha khibradda leh waxay si sahal ah u socon karaan in ka badan 30 mitir saacaddii kasta). Waxay sidoo kale leeyihiin muuqaallo yaryar oo mararka qaarkood laguma dareemo gudaha gaadiidka. Si taxadar leh u raadi baaskiil wadayaasha, gaar ahaan kahor inta aadan leexan mise furin albaabka gaariga.
- Baro inaad aqoonsato xaaladaha iyo caqabadaha laga yaabo inay khatar ku yihiin baaskiil wadayaasha, sida godadka, finiinka, iyo kudaafada. Sii boos ku filan si ay u maraan.
- Filo dhaqdhaqaaqyada baskiil-wadaha. Baaskiil-wadeyaasha waa inay u adeegsadaa tilmaamaan rabitaankooda calaamadaha gacanta.
- Si lama filaan ah ha u dhimin xawaaraha mise joojin gaarigaaga sababtoo ah waxaad u istaagi kartaa si ka dhakhso badan baaskiilka. Dhakhso u joojinta, ayaa waxaad ku sababi kartaa shil.
- Cimmilada xun, sii baaskiil-wadeyaasha boos daba socod dheeraad ah oo ay ku gudbaan, isla sida aad u siin lahayd darawallada kale.
- Yaree xawaarahaaga marka aad gudbayso baaskiil wadayaasha, gaar ahaan haddii waddadu ciriiri tahay.

- Marka waddo aad u ciriiri ah gawaarida iyo baaskiiladu ay si badbaado leh isku dhinac socdaan, baaskiiladu waa inay "qaadaan haadka safarka," taasoo macnaheedu yahay dul maridda mise meel u dhow bartamaha haadka.
- Darawalka gaari u dhow baasliil wade ma samayn karo midig leexasho ilaa si ammaan ah leexashada lagu sameeyo iyo iyadoo aan la faragelin badbaadada iyo hawlgalka sharciga ah ee baaskiilka.
- Ha u isticmaalin hoonkaaga meel u dhow baaskiilada ilaa ay jirto fursad shil. Hoonkaaga ayaa ka nixin kara oo keeni kara inay jidkaaga soo galaan.
- Iska ilaali baskiil-wadeyaasha soo galaya laynkaaga. Iska eeg haddii aad aragto carruur wadda baaskiil waddo lugeedka sababtoo ah waxaa laga yaabaa inay si lama filaan ah usoo galaan wadada.
- Xoog ha u leexan baaskiillada hortooda. Haku khasbin baskiil-wade inuu jidka ka baxo.
- In kasta oo baskiil-wadeyaasha looga baahanyahay inay raacaan jihada taraafikada, waa inaad raadisaa iyagoo raacaya meel kasta oo wadada ah.
- Si aad ah uga digtoonow baskiil-wadeyaasha marka waddadu qoyan tahay mise ay leedahay ciid ama jay.  Waxyaabahani waxay saameeyaan baaskiillada in ka badan gawaarida kale.
- La shaqee baskiil-wadeyaasha. Waa inay isticmaalaan tilmaamta Gacanta marka ay leexanayaan mise joogsanayaan. Waxaa laga yaabaa in aysan awoodin inay tilmaamaan haddii xaaladdu ay u baahan tahay labada gacmood ee gacmaha baaskiilka. Raadi tilmaamo kale oo kusaabsan waxay qorsheynayaan inay sameeyaan. Wadayaasha sida caadiga ah way soo jeestaan iyagoo eegaya kahor intaysan bedelin laynka mise leexan.



**Joogso** **Bidix u leexasho** **Midig u leexasho mise Midig u leexasho**

- Marka lagu baarkimo wadada, ka eeg dhinacyada oo gadaal u fiiri baaskiilka kahor inta aadan furin albaabkaaga. Marka la furayo albaabka gaariga, habka “Dutch Reach” ayaa lagugula talinayaa. Isticmaalka habka Dutch Reach, darawalku wuxuu furi doonaa albaabkiisa isagoo isticmaalaya gacanta midig. Isticmaalka gacanta midig waxay keentaa in jirku u leexdo bidix taas oo ku qasbeysa darawalka inuu eego garabka wadada dhinaceeda taasoo sahlaysa in la arko baaskiil wadayaasha soo socda.
- Ka hubi baaskiil-wadeyaasha waddadaada kahor inta aanad dib u bixin. Aad uga digtoonow meelaha u dhow dugsiyada mise xaafadaha ee laga yaabo inay joogaan baaskiil wadayaasha.
- Carruurta mise dadka qaangaarka ah ee aan khibradda lahayn ee baaskiillada wada inta badan lama saadaalin karo falalkooda. Lamafilaan filo.

### Hawlgalka Baaskiilka

Baaskiil wadayaasha waa gawaari waxayna leeyihiin dhammaan xuquuqda iyo mas'uuliyadaha darawallada kale ee gawaarida. Inkastoo shatiga aan loo baahnayn in baaskiil lagu kaxeeyo wadooyinka Maine, baaskiil wadayaashu waa inay adeecaan dhammaan xeerarka waddada. Haddii aad jabiso mid kamid ah sharciyada taraafikada, sida inaad baaskiil ku wado dhinaca bidix ee wadada, ku dhex orda tilmaamta joogsiga mise nalka taraafiggu, waxaa lagugu ganaaxayaa.

Hubi inaad ku barbarato baaskiilkaaga kahor intaadan gelin taraafikada. Marna ha raacin taraafikada ka badan heerka xirfaddaada. Markaad baaskiil wadato raac xeerarkan:

- **Si joogto ah u baar oo u ilaali baaskiilkaaga.** Baaskiilladu, sida mishiin kasta, waa in si fiican loo ilaaliyaa si ay si sax ah u shaqeyaan. Nabad noqo oo baaskiilkaaga hagaaji mise u qaado dukaanka baaskiilka si si joogto ah loogu baaro (baaritaan xirfadeed ayaa lagugula talinayaa lixdii biloodba mar.)
- **Rarka si habboon u xafid.** Marna ha surin bacaha mise xirmooyinka biraha gacmaha mise haku qaban gacmahaaga. Ku xafid rarka khaanad, boorsooyinka baaskiilka, mise isjiidka baaskiilka. Kaliya u isticmaal xirmooyinka dambe ee rarka fudud.
- **Si sax ah u xiro koofiyadda shilka.** Marka si sax loo xirto, koofiyadda baaskiilku waxay yarayn kartaa fursadahaaga dhaawac madaxa ee shilka. Kaliya isticmaal koofiyada ANSI/Snell ee la ansixiyay oo si gaar ah loogu talagalay baaskiil wadida. Marka koofiyaddu jug gaarto waa in la beddelaa. Koofiyadaha waa in sidoo kale la beddelaa haddii ay shan jir sadaan mise ka weyn yihiin mise lagaga dhex tago gaari kulul. Marka si sax ah loo xirto, koofiyada waa in lala simaa sunniyaahaaga korkooda oo ay le'egtahay madaxaaga si aysan uga dhicin haddii aad madaxaaga ruxdo. Haddii koofiyaddaadu dabacsantahay mise ay gadaal u janjeerto oo dhafoorkaagu muuqdo si ku filan madaxaaga uma ilaalin karto. Dhammaan dadka da'doodu ka yar tahay 16 sannadood ee baaskiillo wada waxaa looga baahanyahay inay xirtaan koofiyada oo ay ku fariistaan kuraasta rakaabka marka ay marayaan waddo guud.
- La soco gaadiidka. Had iyo jeer qaad dhanka midig ee waddada. Haka gudbin baabuurleyda dhanka midig. Haddii aad u dhawaato isgoys leh layn toosan oo aad rabto in aad si toos ah u sii waddo, ha galin jidka midig leexashada. Dhex mar gaadiidka dhexdooda.
- Iska eeg waddo khatar ah. Had iyo jeer isha mari wadada 50 ilaa 100 fiir oo hortaada ah khataraha wadada sida qashinka, godadka, jidadka tareennada (ka gudub xagasha saxda ah), barkadaha (kuwaas oo qarinaya godad), mise qashinka waddada. Dhin xawaaraha oo sii wakhti aad ku dhexmarto khatarahan oo kala xaajoo gawaarida.
- Ka fogow furista albaabka gaariga. Naftaada sii boos saddex mise afar fiit u dhexeeya adiga iyo gawaarida lagu baarkimto.
- U soco qaab la saadaalin karo. Had iyo jeer toos u soco oo ahow mid la saadaalin karo. Ha u leexleexan kolba dhinac, mise lamafilaan ha ugu dhex bixin taraafikada. Feejignow oo qorshee inaad ka fogaato carqaladaha. Haddii waddadu ku dhuubantahay baaskiilka iyo gaariga in ay is dhinac socdaan, baaskiil-waduhu waa inuu qabsadaa haadka ilaa inta ay ammaan noqoneyso in dib loogu laabto midigta. Had iyo jeer iska eeg garabkaaga kahor inta aanad bedelin booskaaga haadka. Marna haku dul leexleexan gawaarida Baarkiman.
- Tilmaamidda leexashada. Ka Darawal ahaan waa inaad had iyo jeer tilmaamtaa rabitaankaaga leexasho, adigoo isticmaalaya tilmaamta gacanta ee qaybtan hore loogu muujiyey. Eeg kahor intaadan bedelan haad mise leexan. Hubi in waddooyinku ka fog yihiin taraafikada si aad si ammaan leh u beddesho haad mise leexato.
- Bidix leexasho. Waxaad u leexan kartaa bidix ka gaari ahaan adigoo u dhaqaaqaya haadka bidix mise dhinaca bidix ee haadka safarka. Kahor intaadan dhaqdhaqaaqin, gadaal u eeg taraafikada, tilmaam leexashadaada oo beddel booska haadka marka ay firaaqo tahay inaad sidaas samayso. Mise, waxaad samayn kartaa bidix leexasho oo laba qaybood ah adigoo si toos ah uga gudbaya isgoyska kadibna u dhinac u baxaya. Hadda, marka ay ammaan tahay in sidaas la sameeyo, u leexo bidix oo u gudub dhanka isgoyska.
- Qalabka habeenkii. Baaskiilku waa inuu lahaadaa nal hore oo bixiya iftiin cad oo ugu yaraan ka muuqda masaafo 200 fiit horteeda. Sidoo kale, nalka cas mise jaallaha ah mise birbirqaha dambe ee ka muuqda ugu yaraan 200 fiit xagga dambe. Walxaha birbirqa ayaa lagula taliyaa badeellaha, ilaa in baaskiil-wadehu xiranyahay mooyee walxo birbirqa cagaha mise anqawyada.
- U diyaar garow dhacdooyin. Had iyo jeer sii qaado biyo oo xiro dhan habboon marka aad baaskiil ku safreyso. Marka uu roob jiro, u oggolow naftaada masaafada joogsiga dheeraadka ah marka aad isticmaasho bareegyada.

## Mootooyinka mise Dhugdhugley

Baskiil wadayaasha waxaay leeyahihiin isla xuquuqda iyo mas'uuliyad la midka ah darawallada gawaarida. Cutubkan wuxuu daboolaysaa macluumaadka aasaasiga ah ee mootooyinka iyo mootada leh matoor. Buug-yaraha barashada oo gaar ah ayaa diyaar ah si loogu diyaariyo tijaabada ogolaanshaha/shatiga mootada. Waxaa jira macluumaad gaar ah oo aad u baahantahay inaad ogaato si aad si nabdoon ula wadaagto wadada mootooyinka:




- Sii layn buuxa mootooyinka. Ha isku dayin inaad layn la wadaagto. Mootooyinka waxay u baahanyihiin boos si ay kaga falceliyaan gaadiidka kale.
- Mootooyinka wey yaryihiin sidaa darteed wey adagtahay in la arkaa. Had iyo jeer u eeg muraayadahaaga iyo meelaha aan muuqan iyaga.
- Kahor intaadan biddix u leexan ka feejignow mootooyinka. Si taxaddar leh u eeg dhinacyada iyo hortaada.
- Ha rumaysan in mootada leexanayso marka ay leedahay tilmaamaha leexashada. Tilmaamaha leexashada ee mootada waxaa laga yaabaa in aysan is damin sidaas darteed waxaa laga yaabaa in waduhu uu illoobay tilmaamta.



- Markaad daba socoto mooto, ugu yaraan 4 il biriqsi ka dambee. Marka qoyaan jiro, kordhi masaafada daba socodka. Wadayaasha waxaa laga yaabaa inay si lama filaan ah u beddelaan xawaaraha mise booska layn si ay uga fogaadaan godadka, jayga, qoyaanka mise meelaha simbiririxashada. Waxa kale oo laga yaabaa inay beddelaan xawaaraha mise jihada sabab ah laami dildillaacsan, isgoysyada tareenada iyo laamiga mutuleelka. Dhammaan kuwan ayaa khatar ku noqon kara mooto wadeyaasha.
- Xusuusnow in mootooyinka beytariga ku shaqeeya iyo baaskiillada matoorka leh ay ku socdaan xawaare aad uga hooseeya kan mootooyinka.

Waxaa sii kordhaya mootooyinka waddada. Waxay xaq ugu leeyihiin waddada sida gawaarida. Sii inta boos ee aad gaari siin lahayd. Markaad mooto gudubto, sii layn dhan. Ha isku dayin inaad isla laynkaas ku ciriirido. Wadaha mootada ayaa si degdeg ah u dhaqaaqa kolba dhinac, si uu u arko loona arko, ugana fogaado walxaha waddada yaalla.

Wadeyaasha mootooyinka ma ilaaliyaan rakaabkooda. Sidaa darteed, waxay ku lug leeyihiin ku dhawaad 10% dhammaan dhimashada gawaarida, inkastoo ay ka yihiin 4% oo keliya gaadiidka waddada.

Shilal badan oo mootooyinka ah, darawallada gawaarida kale ayaa khaladka leh. Darawallada u leexanaya dhanka bidix ee mooto soo socota ayaa sababa shilal badan. Waxay ku guuldareystaan inay arkaan mootada, mise waxay u maleynayaan in mootada dhimayso xawaaraha sida dhabta ah.

Sug inta mootada soo socota ku gudbeyso kahor inta aadan bidix u leexan.

## Gawaari Wayn

